**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
جمهورية صوماليلاند

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**
مكتب الرئيس

**Tix; JSL/XM/WM/222-278/072026** **Taariikh: 06/07/2026**

# WAREEGTO MADAXWEYNE

**Dhaqan-galka Wax-ka beddelka & Kaabista Xeerka Maamulka Maaliyadda ee Dawladda Xeer. Lr.75/2025.**

**Markii aan arkay:** Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan arkay:** Qodobada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan helay:** Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiilada ee Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Maaliyadda ee Dawladda Xeer. Lr.75/2025. (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/13/2026), ee summadiisu tahay GW/G/12/201/2026, kuna taariikheysan 24/06/2026.

**Waxa aan Soo-Saaray:**

Wareegtadan oo lagu dhaqan-gelinayo laguna faafinayo Wax-ka-baddelka iyo Kaasbista Xeerka Maamulka Maaliyadda ee Dawladda **Xeer Lr.75/2025.**

**ALLAA MAHAD LEH**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

**Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
Golaha Wakiilladda

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**

**Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker**

Line: +252-513503 *(Hargeisa - Somaliland)* E-mail: speakersomalilandparliament@gmail.com

Ref: GW/G/12/201/2026 Date: 24/06/2026

**Ku: Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi (Cirro)**
**Madaxweynaha JSL** **= Madaxtooyda=**

**UJEEDDO: Soo Gudbin Go'aanka Ansixinta Xeerarka iyo Jawaab-ceelinta.**

*Mudane Madaxweyne,*

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Xeerarka Goluhu Ansixiye iyo Jawaab- celinta Golaha Wakiillada ee la xidhidha soo celinta Xeerka Horuamrinta Warshadaha Xeer. Lr.111.2026.

1. **Go**'aanka Ansixinta soo jeedinta Madaxwaynaha ee wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (**NADFOR)** Xeer **Lr. 35/2026. (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/11/2026).**

2. Go'aanka Ansixinta Wax-ka-baddelka iyo Kaasbista Xeerka Ciidanka Booliska Xeer. **Lr.63/2026 (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/12/2026).**

3. Go'aanka Ansixinta soo jeedinta Madaxwaynaha ee Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Maaliyada ee Dawladda Xeer. Lr.75.2025. **(Go'aan Lr. GW/KF-14/16/13/2026).**

4. Go'aanka Ansixinta Diidmada dib u soo ceelinta wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeeka Maamulka Tamarta Somaliland **Xeer. Lr. 81/2026 (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/14/2026).**

5. Jawaab-celinta Golaha Wakiillada ee la xidhidha soo celinta Xeerka Horumarinta Warshadaha Xeer. Lr.111/2026. ( **Go'aan Lr. GW/KF-14/16/15/2026)**

**ALLAH MAHAD LEH**

**Md. Yaasiin Xaji Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA
GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SPEAKER
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

RECEIVED
BY PRESIDENCY:
Reg No: 502/2026

Ujeedo: - Go'aanka Ansaxinta Soo jeedinta M/waynaha ee Wax-ka - beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Maaliyada ee Dawladda Xeer. Lr.75/2025

GOLAHA WAKIILLADU

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: - | Qodobka 53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Markuu Aqoonsaday:** - | Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Jaangoynta maaliyada, ansixinta Miisaaniyad sanadeedka dawlada, ogolaanshaha galida kharashaadka dhamaan arimaha la xidhiidha Maaliyada. |
| Markuu arkay: - | Baahida loo qabo xeer lagu dhaqo habsami u maamulida hanaanka miisaaniyadda Qaranka iyo dejinta habraacyo lagu hago diyaarinta iyo meel marinta miisaaniyada dawladda oo Golaha Wakiiladu masuul ka yahay wax qoondeynteeda sanadkasta. |
| Markuu Xaqiiqsaday: - | In aanu jirin xeerar ku filan oo lagu maamulo siyaasada maaliyada dalka iyo hanaanka loo diyaarinayo miisaaniyada, isla markaana loogu soo gudbinayo Golaha Wakiilada, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka. |
| Markuu Ogaaday: - | Muhiimada ay leedahay in dhaqaalaha iyo maaliyada dalka laga dhigo mid hufan, kaas oo waajibaadkooda Datuur iyo sharciyeedba ay ka gutaan laamaha ku shaqada leh sida Xisaabaadka Guud ee dawlada, Hanti-dhowraha Guud, Wasaarada Maaliayada iyo Golaha Wakiilada. |
| Markuu Tixgeliyay: - | Doodihii, iyo afkaartii ay mudanayaasha Golaha Wakiiladu ku dhiibteen Mashruucan-sharci ee lagu maamulayo Maaliyada iyo Miisaaniyadsanadeedka dawladu ku shaqayso. |
| Markuu arkay:- | Soo jeedinta xukuumadda ee wax ka beddelka iyo kaabista xeerkan Booliska ay kusoo sameysay. |

**Markuu u Codeeyay : -** Soo jeedinta M/waynaha ee Wax-ka- beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka maaliyada ee Dawladda Xeer Lr.75/2025 ,kalfadhigii 14aad fadhigiisi 10aad ee Golaha Wakiilada kuna taariikhaysna **13/06/2026** oo ay Goob joog ahaayeen **(55)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(37 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Soo jeedinta M/waynaha ee **Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Maaliyada ee Dawladda Xeer Lr. 72/2025**,

halka kow iyo Toban **(11)** Mudane ka Diideen, Lix **(6)** Mudanena ka aamuseen, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

**Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)**
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL

GOLAHA WAKIILADA — JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA ARKIIFIYADA — MADAXTOOYADA

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILLADA

GOLAHA WAKIILADA ARKIIFIYADA J. SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND

## Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda
## Xeer.Lr.75/2025

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## *GOLAHA WAKIILLADU*

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: - | Qodobka 53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Markuu aqoonsaday:** - | Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha Wakiillada Jaangoynta maaliyadda, ansixinta miisaaniyad sanadeedka dawladda, oggolaanshaha gelida kharashaadka dhamaan arrimaha la xidhiidha maaliyadda. |
| Markuu arkay: - | Baahida loo qabo xeer lagu dhaqo habsami u maamulidda hannaanka miisaaniyadda Qaranka iyo dejinta habraacyo lagu hago diyaarinta iyo meel marinta miisaaniyadda dawladda oo Golaha Wakiiladu masuul ka yahay qoondaynta miisaaniyadda sannad kasta. |
| Markuu xaqiiqsaday: - | In aanu jirin xeerar ku filan oo lagu maamulo siyaasadda maaliyadda dalka iyo hannaanka loo diyaarinayo miisaaniyadda, isla markaana loogu soo gudbinaayo Golaha Wakiillada, si'waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka. |
| Markuu ogaaday: - | Muhiimadda ay leedahay in dhaqaalaha iyo maaliyadda dalka laga dhigo mid hufan, kaas oo waajibaadkooda Dastuur iyo sharciyeedba ay ka gutaan laamaha ku shaqada leh sida: Xisaabaadka Guud ee dawladda, Hantidhawraha Guud, Wasaaradda Maaliyadda iyo Golaha Wakiillada. |
| Markuu tixgaliyay: - | Doodihii iyo afkaartii ay mudanayaasha Golaha Wakiilladu ku dhiibteen mashruucsharcigan, kaas oo lagu maamulayo maaliyadda iyo miisaaniyad sanadeedka dawladdu ku shaqayso. |
| Markuu arkay:- | Soojeedinta xukuumadda ee wax kabeddelka iyo kaabista xeerkan Maamulka Maaliyada ay ku soo sameysay. |

## Wuxuu Ansixiyay

## Wax kabeddelka iyo kaabista Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda Xeer Lr.75/2025

Wax ka badel iyo Kaabistii 1aad
First amendment of the act

# QAYBTA KOWAAD
# QODOBBO GUUD

**Qodobka 1aad**
**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa *Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda Xeer Lr.75/2025*

**Qodobka 2aad**
**Erey Bixinta Xeerka**

Haddii aanu nuxurku weedha ay ku jiraan macne kale siinin, ereyada iyo weedhaha soo socda macnawhoodu wuxuu nooqnayaa sida ku hor qoran:-

1) **Xisaabiyaha Guud:** Waxa loola jeedaa qofka loogu magacaabay inuu noqdo Xisaabiyaha Guud si'waafaqsan qodobka 28aad ee xeerkan.
2) **Guddida Hantidhawrka:** Waxa loola jeedaa guddida hantidhawrka gudaha ee loo aasaaso siwaafaqsan qodobka 32aad ee xeerkan.
3) **Sarkaalka/saraakiisha fulineed:** Waxa loola jeedaa saraakiisha hay'adaha dawladda ee ka masuulka ah maamulka arrimaha maaliyadda ee ay ka midka yihiin kuwan soo socdaa:
   b) Agaasimayaasha guud ee wasaaradaha.
   t) Xoghayayaasha labada gole ee sharci dejinta (Wakiillada iyo Guurtida).
   j) Agaasimayaasha guud ee kommishannada iyo hay'adaha gaarka ah ee dawladda dhexe ee leh agaasimayaal guud.
   x) Agaasimaha Guud ee xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.
   Kh) Kaaliyaha Sare ee Maxakamadda Sare.
   d. Sarkaalka madaxa ka ah hay'ad dawladeed, marka hay'addaasi dawladeed aanay lahayn Agaasime Guud.
   r. Mareeyayaasha shirkadaha dawladda.
   s. Xoghayayaasha golayaasha dawladaha hoose iyo degmooyinka.
4) **Xeerka Miisaaniyadda:** Waxa loola jeedaa xeer kasta oo dhaqangal ah oo dhigaya qoondayn miisaaniyadeedka dakhliga iyo kharashka dawladda ee loo qoondeeyay hal sannad miisaaniyadeed.
5) **Hantidhawraha Guud:** Waxa loola jeedaa qofka loogu magacaabay Hantidhawre Guud si'waafaqsan qodobada 93(3) iyo 114aad (1) ee Dastuurka iyo Xeerka Hantidhawrka Guud.
6) **Miisaaniyad:** Waxa loola jeedaa hannaanka ay dawladdu u dejiso odoraska dakhliga soo galaya iyo qoondayn maaliyadeed oo wax ku oolnimo ah, looguna kala qoondeeyay dhammaan waaxyaha kala duwan ee dawladda, si looga midho dhaliyo ujeeddooyinka Qaranka.
7) **Madaxa/madaxda:** Waxa loola jeedaa qofka ah wasiir ama madaxa ugu sarreeya maamulka ama hoggaaminta hay'ad dawladeed.
8) **Ballanqaad/ballanqaadka"**: Waxa loola jeedaa qandaraas ama heshiis ama nidaam kale oo xambaarsan waajib sharci ah oo ku waajibinaya ama jidaynaya in lacag kharash ah laga bixiyo qasnadda ama keydka dakhliga guud.
9) **Qoondayn Kharasheed:** Waxa loola jeedaa ku talaggal kharash lagu ansaxiyay laguna qoondeeyay xeer miisaaniyadeed ama xeer kab miisaaniyadeed.
10) **Sannad Maaliyadeed:** Waxa loola jeedaa muddo laba iyo toban bilood ah oo ka bilaabanta 1da Janawari (Janaury) kuna eg 31ka Diisambar (Desember).
11) **Kaydka Dakhliga Guud:** Waxa loola jeedaa qasnadda kaydka dakhli guud ee Jamhuuriyadda Somaliland ee lagu uu aasaasay qodobka 34aad ee xeerkan.
12) **Dawlad:** Waxa loola jeedaa dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.
13) **Dastuur/Dastuurka:** Waxa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
14) **Madaxweynaha:** Waxa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

15) **Hay'ad Dawladeed:** Waxa loola jeedaa wasaarad, waaxyaha qaranka, wakaalad ama hay'adaha gaarka ah ee dawladda ka tirsan.

16) **Hantidhawrraha Gudaha:** Waxa loola jeedaa xubin madaxbannaan oo shaqadiisuna tahay in uu sameeyo baadhitaan sugan oo madaxbannaan iyo adeegyo latalineed oo kor loogu qaadayo habsami u socodka hawlaha hay'adda, isla markaana loogu talaggalay inay hay'adaha dawladda ka caawiyaan gaadhitaanka ama ka midho dhalinta ujeeddooyinkooda iyada oo la dejinayo qaabab nidaamsan oo dhawrsan oo lagu qiimeeyo laguna horumariyo taabbagelidda nidaamyada maaraynta khatarta, xakamaynta iyo habsami u socodka maamulka hawlaha.

17) **Illaalinta gudaha (internal control):** Waxa loola jeedaa nidaamyo u dejisan hay'ad dawladeed, si loo xaqiijiyo in xogta maaliyadeed iyo xogaha kale ee maaraynta hantida qaranka yihiin xogo laysku hallayn karo oo dhammaystiran iyo xaqiijinta u hoggaansanaanta siyaasadaheeda maaraynta maaliyadda, nidaamsanaanta iyo hufnaanta hawl gudashadeeda, iyo habsamida hannaanka diiwaangelinta iyo ilaalinta hantida iyo khayraadka Qaranka.

18) **Qasnadda Midaysan ee Kaliyaata (Treasury Single Account):** Waa hab lagu midaynayo xisaabta bangiyada uga furan dawladda, taas oo suurtagelinaysa inay ina siiso muuqaal mid ah, inagana siinaysa lacagta naqadka ah ee dawladda. Iyada oo la isticmaalayo mabda'a midaynta lacagta naqadka ah; qasnadda midaysani waa xisaab bangi ama xisaabo bangi oo la isku xidhay, taas oo macaamilka dawladda ee bixinta iyo dhigaalkaba lagu sameeyo.

19) **Nidaamka Maamulka Xogaha Maaliyadda ee Somaliland:** (Somaliland Financial Management Information System "SLFMIS"): Waa nidaamka lagu kaydiyo xogta maamulka maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland, waana habka rasmi ahaan dawladdu u isticmaasho dhammaan arrimaha kala duwan ee khuseeya maamulka maaliyadda sida in lagu qorsheeyo, lagu diyariyo miisaaniyadda, laguna fuliyo kharash bixinta, mushaharka iyo iibka lagana helo dhammaan warbixinaha maaliyadeed.

20) **Qiime galka Lacagta** (best value for money)**:** Waxa loola jeedaa in si madhxin leh iyo dhaqaalayn leh oo hufan oo wax ku ool ah loo isticmaalo khayraadka dawladda, taas oo suurtagelinaysa in la gaadho hadafkii laga lahaa shayga.

21) **Amaah:** Waxa loola jeedaa deyn lacageed oo kasta oo ay amaah ahaan dawladdu u qaadato.

22) **Golayaasha Dawladaha Hoose:** Waxa loola jeedaa degmada ama golaha deegaanka ee uu aasaasayo Xeerka Wax Kabeddelka Iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolada Iyo Degmooyinka, (Xeer Lr.23/2019).

23) **Wasiir:** Waxa loola jeedaa wasiirka masuulka ka ah arrimaha maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

24) **Saxnimadda:** Waxa loola jeedaa waajibnimada in kharashka iyo dakhliga dawladda loo maareeyo si'waafaqsan ujeeddooyinka Golaha Wakiilladu u qoondeeyay, gaar ahaanna kuwa lagu sheegay guddida dhaqaalaha.

25) **Lacagaha Dawladda:** Waxa loola jeedaa

b) Dhammaan lacagaha dakhliga dawladda

t) Lacagaha ay maamulaan hay'adaha dawladdu ama cid u wakiil ah dawladdu, marka laga reebo lacagaha ay cid gaar ah oo aan dawladda ahayn leedahay.

26) **Sarkaal Dawladeed:** Waxa loola jeedaa qofka haya ama matalaya xafiis qaranka u adeega.

27) **Wakaalad Dawladeed:** Waxa loola jeedaa shirkad ganacsi, wakaalad ama hay'ad dawladeed oo ka mid ah hay'adaha dawladda ee lagu dabbaqayo qodobka 66aad ee xeerkan, sidoo kale wakaalad dawladeed waa hay'ad kasta oo dawladeed oo aan ahayn miisaaniyadle, kuwaas oo ay ku jirayaan:

b) Hay'ad kasta oo ah ganacsi ama dabeecado ganacsi leh oo ku aasaasan xeer aan ahayn xeerka shirkadaha ama golayaasha deegaannada.

t) Shirkad ku aasaasan xeerka shirkadaha taas oo ay leedahay dawladdu

j) Shirkad ganaci oo ay dawladdu:

I. Magacawdo ama go'aamiso cidda ka mid noqonaysa guddida agaasinka ee shirkadda.

II. Hoggaaminayso ama gacanta ku hayso hoggaaminta in ka badan boqolkiiba konton codadka laga dhiiban karo kulanka guud ee shirkadda.

III. Maamusho ama leedahay in ka badan boqolkiiba konton saamiyada raasamaalka shirkadda, marka laga saaro qayb kasta oo ka mid ah saamiyadaa raasamaal ee la soo saaray ee aan lahayn wax xuquuq ah oo ay kaga qayb galaan marka laga reebo qaddarka loo cayimay ee loo qaybin doono macaash ahaan ama raasamaal ahaan.

28) **Hantida Dawladda:** Waxa loola jeedaa khayraadka ay dawladdu leedahay ama ku jira gacanta ama hantida dawladda.

29) **Sharcinimo/da:** Waxa loola jeedaa waajibnimida in kharashka iyo dakhliga dawladda loo maareeyo si'waafaqsan xeerarka khuseeya ee ay ka mid ka yihiin xeerkan iyo xeernidaamiyayaasha, awaamiirta, wareegtooyinka iyo habraacyada ka farcamay xeerkan.

30) **Khayraad:** Waxa loola jeedaa oo ka mid ah: lacagta, bakhaarada, hantida, alaabta, amaahda iyo maalgelinta;

31) **Xeerka Kaabis Miisaaniyadeed:** Waxa loola jeedaa xeer lagu oggolaaday qoondayno miisaaniyadeed lagu kordhiyay miisaaniyadda qaranka ee uu hore u qoondeeyay Xeerka Miisaaniyadda ee kalka sannad miisaaniyadeedka lagu guda jiro.

32) **Xarun Kharasheed:** Waxa loola jeedaa hay'ad, guddi, komishan, wakaalad, xafiis, dawlad hoose ama wasaarad qoondo ku leh miisaaniyadda.

33) **Madaxa:** - Waxa loola jeedaa madax kharasheed (xisaabeed) ee miisaaniyadda ku jira.

34) **Madax xigeen:** Waxaa loola jeedaa faracyada hoos yimaadda madaxyada kharasheedka Miisaniyadda.

35) **Lacagaha dawladda dhexe u qabato dawladaha hoose:** - Waxa loola jeedaa, lacag kasta oo dawladda dhexe u qabato dawladdaha hoose.

36) **Hannaan:** - Waxa loola jeedaa jaranjarrada loo maro dhammaystirka shaqo ama nidaam.

37) **Dhigaal:** - Waxa loola jeedaa dhammaan kaydadka Qaranka.

38) **Muddada Dhexe:** - Waxaa loola jeedaa sannad misaaniyadeedka diyaarinta miisaaniyaddiisa lagu gudo jiro iyo labada sanno ee ka dambeeya sannadkaas.

## Qodobka 3aad

## Ujeedada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa:

1. In la helo xeer qeexaaya awoodaha iyo doorarka kala duwan ee ay ku leeyihiin miisaaniyadda Qaranka diyaarinteeda, dejinteeda iyo ansixinteeda golayaasha xukuumadda iyo Wakiiladdu.
2. In la helo xeer qeexaaya oo faahfaahinayana meertada (budget cycle) ay marto diyaarinta miisaaniyaddu bar bilow illaa bar dhammaad.
3. In la aasaaso sanduuqa kaydka dhigaalka guud ee Qaranka.
4. In la helo xeer tilmaamaaya qaabdhismeedka guud ee ay yeelanayso miisaaniyadda Qaranku.
5. In lagu aasaaso kaydka dakhliga guud ee dawladda.
6. Inuu dejiyo nidaam cad oo xaqiijin kara hufnaan, daahfurnaan, islaxisaabtan dhammaystiran oo lagu maamulo dhammaan arrimaha khuseeya maaraynta maaliyadda Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland; isagoo qeexaya arrimo ay ka mid yihiin:
   - b. Inuu qeexo awoodaha iyo waajibaadyada shaqo ee saraakiisha u xilsaaran maaraynta maaliyadda dawladda.
   - t. Inuu nidaamiyo qaababka iyo habraacyada maaraynta maaliyadda dawladda, diyaarinta, ansaxinta iyo fulinta miisaaniyadda Qaranka.
   - j. Inuu dejiyo hannaanka kormeerka Hantidhawrka Gudaha iyo habka wada shaqaynta Hantidhawrka Guud ee Qaranka iyo Golaha Wakiillada.
   - x. Inuu habeeyo nidaamka maaraynta xisaabaadka iyo warbixinnada dakhliga iyo kharashka, khayraadka dawladda, daymaha, **deeqaha** iyo dammaanadaha dawladda.
   - kh. In uu xoojiyo islaxisaabtanka nidaamka dawladda iyo korjoogtaynta Golaha Wakiillada ee arrimaha khuseeya maaraynta maamulka maaliyadda.

## Qodobka 4aad

## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan hay'adaha dawladda dhexe, dawladaha hoose, hay'adaha dawladda ee madaxabannaan iyo shirkadaha dawaladda ama shirkadaha dawladdu ku leedahay saami iyo dhammaan dhacdo maaliyadeedka ay dawladdu qaybta ka tahay.

# QAYBTA LABAAD
# SIYAASADDA DHAQAALAHA

## Qodobka 5aad

## Dejinta Siyaasadaha Dhaqaalaha Iyo Maaliyadda

Si'waafaqsan Qodobka 94aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka, waajibaadka Golaha Wasiirrada ee diyaarinta siyaasadda dhaqaalaha iyo maaliyaddu wuxuu noqonayaa sidan soo socota:-

B) Ka doodista mabaadii'da, yoolka iyo ujeeddooyinka guud ee siyaasadda iyo go'aaminta mudnaanta siyaadaha maaliyadeed iyo dhaqaalaha guud ee saldhigga u noqonaaya dejinta miisaaniyad sannadeedka, iyadoo loo eegaayo qorshaha horumarineed ee Qaranka (National Development Plan)

T) Oggolaanshaha mashruuc sharci maaliyadeedka guud ee sannadlaha ah ee Qaranka, ka hor intaan loo gudbin Golaha Wakiillada.

J) Darsidda, qiimaynta, hubinta iyo la'socodka xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee dalka guud ahaan, si looga feejignaado khataraha dhaqaale iyo maaliyadeed ee xilli kasta ku iman karta dalka.

X) Ansixinta siyaasadaha dhaqaalaha (Economic policies) iyo maaliyadda (Fiscal Policies) ee Qaranka.

## Qodobka 6aad

## Ujeeddooyinka iyo Mabaa'diida Siyaasadda Maaliyadda

1) Ujeeddooyinka dawladdu ka leedahay jaangoynta guud ee dhaqaalaha iyo ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda ee ku xusan qodobka 5aad ee sare waa si'loo xaqiijiyo xasiloonida dhaqaalaha guud iyo koboc dhaqaale oo ku salaysan qorshaha horumarinta Qaranka.
2) Siyaasadda Maaliyaddu waxay saldhig u noqon doontaa diyaarinta, dejinta iyo go'aan ka gaadhidda ama ansixinta miisaaniyad sannadeedka markaas diyaarintiisa lagu gudo jiro.
3) Ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda waxa sal looga dhigayaa mabaadii'dan soo socda:
    b. Sugidda iyo helista dakhli ku filan maalgelinta mashaariicaha iyo hawlaha dawladda.
    t. Habsamida iyo hufnaanta maamulka daymaha dawladdu ku maalgeliso mashaariicaha "programmes".
    j. Dheellitirnaanta iyo wax ku oolnimada maaliyadda muddada dhexe.
    x. Habdhis maaliyadeed iyo dhaqaale guud oo ku salaysan ama la jaanqaadaya qorshaha horumarka Qaranka.
    kh. Habsami u maaraynta khataraha.
    d. Kharash bixin ku salaysan hufnaan, wax ku oolnimo iyo qiimagalka lacagta (value for money).
4) Iyadoo laga duulayo mabaa'diida sare, wasiirku wuxuu diyaarin doonaa jaangoynta ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadeed, kaas oo saldhig u noqon doona diyaarinta buugga habdhiska miisaaniyadda oo qeexi doona habdhiska siyaasadda iyo dhaqaalaha guud ee muddada dhexe.
5) Buugga habdhiska miisaaniyadda waxa si'waafqsan qodobka 10aad ee xeerkan loogu gudbin doonaa Golaha Wakiillada, si uu uga doodo talana uga bixiyo.
6) Xukuumaddu waa inay kusoo lifaaqdo siyaasadda maaliyadda oo faahfaahsan odoroska miisaaniyadda oo yeelandoona dabeecadda mashruucsharci, siyaasadaas oo

ay soo diyaarin doonto Wasaaraadda Maaliyaddu ka hor intaan la diyaarin odoroska miisaaniyad sannadeedka Qaranka.

7) Xukuumaddu markay ansixiso, waxay si wada jir ah Golaha Wakiillada ugu soo gudbindoontaa siyaasadda maaliyadda iyo odoroska miisaaniyadda oo wada socda, si uu Goluhuna uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah ee lagu qeexay qodobka 55aad faqraddiisa 1aad iyo qodobka 53aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka iyo qodobka 22aad, faqradihiisa 1aad iyo 2aad ee xeerkan.

## Qodobka 7aad

## U Hoggaansamidda Ujeeddooyinka iyo Mabaa'diida Masuuliyadaha Siyaasadda Maaliyadda

1. Xukuumaddu waa inay u hoggaansanto mabaadii'da masuuliyadaha siyaasadda maaliyadda ee ku xusan qodobka 6aad ee xeerkan iyo ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda ku jira buugga habdhiska miisaaniyadda.
2. Xukuumaddu waa inay mar walba u hoggaansanto mabaa'diida ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda ee kor ku xusan, hasayeeshee xukuumadda waxa u bannaan fulinta ujeeddooyinka masuuliyadaha siyaasadda maaliyadda ee buugga habdhiska miisaaniyadda:
   b. Damacdo si' ku meelgaadh ah u hakiso gabi ahaan ama qayb ahaan haddii uu qaranku waajaho xaalado lama filaan ah ama degdeg ah, xukuumadduna waydo xal kale oo ay ku maarayso.
   t. Ay ka leexato haddii ay xukuumaddu isbeddesho.
3. Haddii xukuumaddu damacdo inay hakiso fulinta ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda si' waafaqsan faqradda sare ee qodobkan, waxa waajib ah inay Golaha Wakiilada u gudbiso warbixin si cad u tibaaxaysa ama u qeexaysa:
   B- Sababaha kaliftay iyo saamaynta ka dhalanaysa hakintaas.
   T- Qorshayaasha ay ku talagashay ama u diyaarisay sidii ay xal ugu heli lahayd hakintaas.
   J-Muddada uu soconaayo go'aankaa hakintu.
   X-Warbixinta xaaladaha mashaariicda horumarineed ee dawladdu fulintooda bilowday iyo haddii ay jiraan kuwo ay hakisay ama joojisay, sababaha ay u hakisay ama u joogsadeen.
4. Hakinta ku meelgaadhka ah ee lagu sameeyo kharashaadka madaxyo ama madax xigeeno ku jira miisaaniyadda, si loo hubiyo ku filnaanshaha dakhliga waxa wareegto kusoo saaraya wasiirka, haddiise miisaaniyadda dhaqangalka ah dhinaansho ama korodh ku yimaaddo waxa waajib ku ah wasiirka inuu Golaha u soo gudbiyo korodhkaa soo kordhay ama dhinaanshaha ku yimi miisaniyadda.

# QAYBTA SADDEXAAD
# DIYAARINTA IYO ANSIXINTA MIISAANIYADDA

## Qodobka 8aad

## Hannaanka Diyaarinta iyo Ansixinta Miisaaniyadda (Budget Process/Cycle)

Hannaanka diyaarinta iyo ansixinta miisaaniyaddu waxay maraysaa marxaladahan soo socda (Budget life cycle):-

1. Wasiirku wuxuu diyaarinayaa xaashida muuqaalka guud ee lagu faahfaahiyey qodobka 9aad ee miisaaniyadda (Budget Outlook Paper), taas oo saldhigna u noqon doonta diyaarinta:
   b. Muuqaalka dhaqaalaha guud (Macroeconomy and fiscal framework).
   t. Muqaalka siyaasad miisaaniyadeedka sannadka cusub (Budget outlook paper).
   j. Buugga habdhiska miisaaniyadda ee muddada dhexe (Medium term budget framework).
2. Wasiirku intaa kaddib, wuxuu diyaarin doonaa buugga habdhiska (haykalka) maaliyadda iyo dhaqaalaha guud ee muddada dhexe, waxaanu la wadaagayaa dadweynaha si' looga qayb galiyo diyaarinta miisaaniyadda, ra'yigoodana uga dhiibtaan, si' loo xoojiyo hannaanka

islaxisaabtanka, daahfurnaanta iyo aragtida ay muwaaddiniintu ka qabaan waxqabadka dawladda, si' sare loogu qaado kalsoonida ay ku qabaan waxqabadka hay'adaha dawladda iyo si' ay ula wadaagaan Wasaaradda Maaliyadda baahiyahooda mudaanta gaarka ahsu leh ee heer gobol ama degmo ee ay tahay in lagu soo daro miisaaniyadda sannadka cusub ee soo socda, maadama oo ay yihiin dadweynuhu (muwaaddiniintu) kuwa leh awoodda iyo karaamada qarannimo sida ku cad Dastuurka qodobkiisa 1aad, faqradda 2aad.

3. Kaddib dhageysiga dadweynaha ee faqradda sare lagu sheegay, wasiirku wuxuu u gudbin doonaa xaashida (buugga) habdhiska (haykal) maaliyadda iyo dhaqaalaha guud ee muddada dhexe golaha xukuumadda, si uu u darso una ansixiyo.

4. Buugga habdhisku wuxuu xambaarsanyahay xogo iyo daraasado ku saabsan hilaadinta dhaqaale ama maaliyadeed ee saldhig u noqon doona siyaasadda miisaaniyadda iyo odoroska miisaaniyad sannadeedka soo socda waxaanu sawir ka bixinayaa xaaladaha dhaqaale iyo maaliyadeed ee dalka iyo siday u ekaan doonto miisaaniyadda sannadka dambe ee soo socda iyo labada sanno ee kale ee kasii dambeeya sannadkaas, si ay ugu sii xisaabtamaan waxyaabaha ay ku salayn doonaan hilaadinta odoroska miisaaniyadeed ee ay soo diyaarin doonaan hay'adaha kala duwan ee dawladdu, isla markaana loo helo xogaha dhaqaalaha ee dalka.

5. Kaddib ansixinta golaha xukuumadda, wasiirku wuxuu u sii gudbin doonaa buugga habdhiska maaliyadda iyo dhaqaalaha guud ee muddada dhexe guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada oo iyana ka doodi doona, lana tashan doona guddida hawlaha Golaha, ayaa qoraal talo soojeedin ah la wadaagi doona wasaaradda.

6. Buugga habdhiska waxa guddida dhaqaalaha ee Golaha loola wadaagayaa si ay xog uga sii hayaan, una sii fahmaan hilaadinta dhaqaale iyo maaliyadeed ee uu ku salaysnaan doona odoroska miisaaniyad sanadeedka la hor keeni doono iyo labada sanno ee ka dambeeya ee soo socda, si ay doodahooda ugu saleeyaan, una hago xilliga lagu gudo jiro ansixinta odoroska sannadlaha ah ee miisaaniyadda waktigaas diyaarinteedu taagantahay.

7. Kaddib marka wasiirku helo talo soojeedinta guddida dhaqaalaha ee xaashida (Buuga) habdhiska ee faqradda sare lagu sheegay, wasiirku waa inuu soo saaraa wareegtada diyaarinta odoroska miisaaniyad sannadeedka cusub ee lagu sheegay qodobka 11aad, faqraddiisa 2aad ee xeerkan.

8. Kaddib soo saarista wareegtada faqradda sare lagu sheegay, wasiirka waa inay dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladdu ugu soo gudbiyaan odoroska miisaaniyad sannadeedkooda, mudadda lagu cayimay wareegtada ee lagu sheegay qodobka 11aad, faqraddiisa 2aad xeerkan. Marxaladdan waxa dhacaysa falaqaynta iyo difaacashada miisaaniyadda taas oo dhex mari doonta Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale ee dawladda ee odoroska miisaaniyadda soo gudbistay.

9. Wasiirku isaga oo ka duulaya xadka adeegsiga xeerka ee lagu sheegay qodobka 4aad ee Xeerkan, kaddib falaqaynta iyo dhageysiga doodaha kala duwan ee hay'adaha dawladda, waa inuu diyaariyaa odoroska ku talagalka miisaaniyadeed ee Qaranka oo lagu faahfaahin doono siyaasadda maaliyadda iyo odoroska miisaaniyad sannadeedka oo noqonaaya mashruucsharci miisaaniyadeed iyo xogaha kale ee la'xidhiidha ee Goluhu ka dalbado.

10. Wasiirku, kaddib markuu dhammaystiro diyaarinta siyaasadda maaliyadda iyo odoroska miisaaniyadda, waa inuu u gudbiyaa golahiisa xukuumadda, si ay u falanqeeyaan go'aan gole wasiirna ugu go'aamiyaan (ansixiyaan) ka hor intaan loo soo gudbin Golaha Wakiillada.

11. Kaddib, ansixinta golaha xukuumadda, waxa loo gudbinayaa Golaha Wakiillada siyaasadda iyo odoroska miisaaniyad sannadeed kasta, si uu Golaha Wakiilladuna uga doodo, wax kabeddelna ugu sameeyo, haddii ay ula muuqato muhiim, kaddibna uu ugu ansixiyo go'aan Gole, si'waafaqsan qodobka 55aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka.

12. Waa in saddex bilood oo kasta dib u eegis lagu sameeyo lagana warbixiyo qoondayn miisaaniyadeedka dakhliga iyo kharashka, deeqaha iyo mashaariicaha la helay, isla markaana loo gudbiyaa guddida dhaqaalaha ee Golaha.

13. Waa inuu wasiirku fuliyaa nidaam gudaha ah oo lagu xakamaynaaya laguna hubinaayo in miisaaniyadda loo isticmaalo si'waafaqsan sidii uu Golaha Wakiilladu ku soo ansixiyey.

14. Waa in Xisaabiyaha Guud ugu gudbiyaa Hantidhawraha Guud warbixinta xisaabxidh sannadeedka ee sannad maaliyadeed kasta muddo aan ka badnayn afar bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad maaliyadeedka, si'waafaqsan qodobka 33aad faqraddiisa 1aad ee Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr. 76/2016.

15. Si'waafaqsan qodobka 55aad, faqradihiisa 6aad iyo 7aad ee Dastuurka iyo qodobbada 33aad iyo 35aad ee Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr. 76/2016, Hantidhawraha Guud ee Qaranka waxa ku waajib ah inuu ugu soo bandhigo Golaha Wakiillada Xisaabxidhka sannad maaliyadeedkii dhammaaday muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad maaliyadeedka oo ay la socoto warbixin baadhiseedkiisii iyo hantidhawristiisii uu ku sameeyey isticmaalka miisaaniyad sannadeedkaas oo dhammaystiran.

## Qodobka 9aad

### Xaashida Muuqaalka Guud ee Maaliyadda/Miisaaniyadda

1. Wasiirku wuxuu ugu dambayn **10-ka bisha June** ee sannad miisaaniyadeed kasta diyaarin doonaa una gudbin doonaa Golaha Wasiirrada buugga qiimaynta iyo muuqaalka maaliyadeed oo ka koobnaan doona:

   b. Waxqabadka dhabta ah ee miisaaniyadda sannad miisaaniyadeedkii kal hore, marka labar bar dhigo qoondayn miisaaniyadeedkii sannadkaas.

   t. Dib u eegidda iyo wax kabeddelka habdhiska dhaqaalaha guud iyo maaliyadeed ee ku jiray buugga habdhiska maaliyadda ee u dambeeyey, taas oo muujinaysa xogaha lagu saleeyey wax kabeddelka iyo cusboonaysiinta habdhiska dhaqaalaha guud iyo maaliyadeed.

   j. Xogo tilmaam ka bixinaya sida waxqabadka dhabta ah ee miisaaniyadda sannad maaliyadeedka kal hore uu saamayn ugu yeeshay dabbaqidda mabaa'diida masuuliyadaha maaliyadeed ama ujeeddooyinka/ siyaasadda maaliyadeed ee ku qeexnaa buugga habdhiska miisaaniyadda ee u dambeeyey.

   x. Sababaha kalifay dabbaqid la'aanta ujeeddooyinka/siyaasadda maaliyadeed iyo soo jeedimaha xal u helidda dabbaqid la'aanta iyo muddada ay qaadanayso.

2. Si waafaqsan qodobka 9aad faqraddiisa 1aad ee xeerakna, gudidda siyaadda maaliyadda ee golaha xukuumaddu waxay lafaguridoontaa, go'aan ay ku ogolaanaysana ka gaadhi doontaa xaashida muuqaalka guud ee maaliyadda ee loogu soo gudbiyay, si'waafaqsan Faqradda 1aad ee qodobkan.

## Qodobka 10aad

### Buugga Habdhiska Miisaniyadda

1. Wasiirku isagoo ka duulaya kuna salaynaya qorshaha horumarka qaranka isla markaan la kaashanaya wasiirka ka masuulka ka ah qorsheynta Qaranka, wuxuu diyaarinayaa una gudbin doonaa Golaha Wasiirrada ugu dambayn **10-ka bisha July ee** sannad kasta buugga habdhiska miisaaniyadda Qaranka, taas oo ay ku jiri doonaan habdhiska siyaasadda dhaqaalaha guud iyo maaliyadeed ee muddada dhexe iyo jaangoynta mudnaanaha mashaariicda horumarinta iyo ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadeed ee dawladda ee ay hay'adaha dawladda dhexe iyo dawladaha hoose ku salayn doonaan diyaarinta miisaaniyadahooda.

2. Buugga habdhiska miisaaniyadda ee kor ku xusani waa in, ugu yaraan uu si cad u qeexo arrimahan soo socda:

   b. Lafagurka xaaladda dhaqaale ee sannad miisaaniyadeedkii la soo dhaafay iyo muuqaalka Guud ee maaliyadeed ee muddada dhexe, isla markaana qeexaya saadaasha dhaqaalaha guud.

t. Habdhiska maaliyadeed ee muddada dhexe oo si gaar ah u qeexaya odoroska guud ee dakhliga, kharashaadka iyo amaahda dawladda.

j. Odoroska xadaynta kharashka dawladda ee muddada dhexe (Expenditure Limits).

x. Mabaa'diida masuuliyadaha maaliyadeed iyo ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadeed ee muddada dhexe.

**3.** Marka uu diyaarinayo habdhiska miisaaniyadda, wasiirku wuxuu kulanno la tashi ah la qaadan karaa wasaaradda ka masuulka ah qorshaha horumarinta Qaranka, dawladda dhexe, gollaha dawladaha hoose, hay'adaha dawladda, guddida dhaqaalaha ee Gollaha Wakiillada, guddida siyaasadda miisaaniyadda ee Golaha Wasiirrada, ururrada bulshada, jaamacadaha iyo hadba cidda uu u arko muhiim.

4. Kaddib markuu ansixiyo Golaha Wasiirradu, wasiirku wuxuu buugga habdhiska miisaaniyadda u gudbinayaa guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada **20 July** ee sannadka lagu jiro.

5. Guddida Dhaqaalaha ee Goluhu wuxuu, muddo laba toddobaad gudahood oo ka bilaabanta taariikhda uu Wasiirku ugu soo gudbiyo, si'waafaqsan faqradda 4aad, kaga doodi doonaa uguna soo gudbin doonaa Wasiirka Maaliyadda warbixinta falanqaynta iyo talabixinta uu Goluhu kasoo jeedinaayo buuga habdhiska miisaaniyadda.

6. Xafiiska miisaniyadda iyo dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada ayaa Golaha ka caawin doona fahamka buugga habdhiska miisaaniyadda, maaddaama oo uu xambaarsanyahay xogo iyo daraasado ku saabsan hilaadinta dhaqaale ee saldhigga u noqon doona, hagi doona, laguna salayn doono diyaarinta odorosyadda sannad miisaaniyadeedka diyaarintiisa lagu jiro iyo labada sanno ee kale ee kasii dambeeya, hilaadintaas oo saldhig u noqon doonta diyaarinta siyaasadda miisaaniyadda iyo odoroska miisaaniyad sannadeedka soo socda ee diyaarintiisa lagu jiro, taas oo ay tahay inay ku sii xisaabtamaan ama ay raacaan xiliga ay ku gudo jiraan doodda iyo dejinta odoroska miisaaniyad sannadeedka soo socda.

7. Wasiirku, markuu diyarinayo miisaaniyadda sannad maaliyadeedka, wuxuu tixgalin doonaa talabixinta guddida dhaqaaluhu uu u soo jeediyo si'waafaqsan faqradda 5aad ee qodobkan.

## Qodobka 11aad
## Diyaarinta Miisaniyadda Sannadlaha ah

1. Wasiirka wuxuu masuul ka yahay maaraynta geedisocodka diyaarinta sannad miisaaniyadeedka Dawladda.

2. Kaddib markuu helo tallabixinta iyo soojeedinta guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada ee buugga habdhiska si'waafaqsan qodobka 10aad, faqraddiisa 5aad iyo qodobka 16aad, faqraddiisa 5aad ee xeerkan, wasiirku wuxuu ugu dambayn **15-ka bisha August** ee sannad kasta u diri doonaa dhammaan hay'adaha dawladda dhexe, dawladaha hoose iyo hay'adaha madaxa bannaan ee dawladda wareegtada diyaarinta miisaaniyadda, taas oo tilmaamaysa qaabka ay u raaci doonaan diyaarinta miisaaniyadda hay'adahooda.

3. Wareegtada diyaarinta miisaaniyadda ee wasiirku waxay sheegi doontaa ugu yaraan arrimahan soo socda:

   b. Jadwalka diyaarinta miisaaniyadda oo muujinaya taariikhaha dhammaystirka hawlaha kala duwan ee diyaarinta miisaaniyadda.

   t. Habraaca qiimaynta, odoroska dakhliga iyo kharashka.

   j. Arrimaha iyo mudnaanaha siyaasadeed ee muhiimka (key policy issues) ah ee la tixgelin doono marka la diyaarinayo miisaaniyadda.

   x. Xad miisaaniyadeedka ay hay'adaha dawladdu ku salaynayaan diyaarinta odoros miisaaniyadeedkooda.

   kh. Odoroska caddadka lacagta miisaaniyadda dakhli wadaagga (revenue sharing) iyo taageerada (Subsidy) iyo miisaaniyadda hawl daadejinta (decentralization) ee loo qoondeyn doono, kuna soo xisaabtami doonaan dawladaha hoose, markay soo diyaarsanayaan miisaaniyadahooda.

   d. Qaabka soo gudbinta xogaha iyo qoraallada miisaaniyadda.

r. Xog ama arrin kasta oo kale oo uu wasiirku u arko inay waxtar u leedahay geedisocodka diyaarinta miisaaniyadda.

4. Hay'ad kasta oo dawladeed oo hesha wareegtada diyaarinta miisaaniyadda ee wasiirku waa in ay u hoggaansanto tilmaamaha iyo awaamiirta wareegtadaasi ay xambaarsantahay, uguna soo gudbiso odoros miisaaniyadeedkeeda si'waafaqsan qodobka 12aad ee xeerkan.
5. Wasiirku wuxuu xeernidaamiye ku soo saari doonaa habraaca qaabka, goorta iyo goobta ay dadweynuhu kaga qayb qaadan karaan diyaarinta miisaaniyadda Qaranka.
6. Wasiirku wuxuu xaqiijin doona in geedisocodka diyaarinta miisaaniyaddu u fulo si'waafaqsan xilliyada loo cayimo iyo in xilliga loo cayimaa yahay xilli ku filan, in hay'adaha ay khusaysaa ka gutaan waajibaadyadooda, si'waafaqsan Dastuurka iyo xeerkan.
7. Masuul kasta oo hay'ad dawladeed oo hela wareegtada wasiirka ee diyaarinta iyo soo gudbinta miisaniyad sannadeedka, waxa ku waajib ah in baahiyaha gobollada ay ku saleeyaan odoroska miisaniyaddooda.
8. Xilliga diyaarinta miisaniyadda hay'adda, masuulka hay'adda waxa ku waajib ah inuu ku wargaliyo isuduwaha gobol kasta inuu soo diyaariyo baahida iyo hawlqabadka heer gobol , isaga oo la tashanaayaa guddida horumarinta gobolka.

## Qodobka 12aad

## Soo gudbinta Odoroska Miisaaniyad Sannadeedka Hay'adda Dawladda

1. Hay'ad kasta oo hesha wareegtada wasiirka ee ku xusan qodobka 11aad ee sare waa inuu muddo aanka dambayn muddada ku cayiman wareegtada ugu soo gudbiyo wasiirka.

b. Odoroska miisaaniyad sannadeedka oo kala qeexaysa dakhliga iyo kharashka isla markaana loo diyaariyay si'waafaqsan tilmaamaha wasiirka ee ku xusan Faqradda 3aad ee qodobka 11aad ee xeerkan

t. Warbixinaha soo socda.

i. Warbixinta wax qabadka hay'adda ee sannad miisaaniyadeedka kal hore.

ii. Qorshe sannadeedka iyo qorshe saddex biloodle ah oo ay hay'addu u diyaarisay kuna salaysay odoroska sannad miisaaniyadeedka hawlaha ama mashaaricda u qorshaysan hay'adda iyo ujeeddooyinka iyo natiijada waxqabad ee hawlaha iyo mashaariicda u qorshaysan iyo halbeeyada lagu cabbirayo natiijada waxqabadka iyo gaadhista ujeeddooyinka fulinta hawlaha iyo mashaariicda hay'adda.

iii. Qorshaha iibka iyo shaqo qorista shaqaalaha ee sannadka.

iv. Warbixinta tallaabooyinka iyo waxay ka fulisay hay'addu talabixinnadii Gollaha Wakillada ee warbixinta hantidhawraha guud ee sannad miisaaniyadeedkii kal hore.

v. Xogaha ama waxyaabaha kale ee uu amro wasiirku in lagu soo daro.

j. Miisaaniyaddii wasaraadaas/ hay'addaaas oo dhammaan madax xigeennadeedu ay gobolaysanyihiin.

2. Dawladaha hoose waxay si waafaqsan wareegtada wasiirka ee ku xusan qodobkan iyo qodobbada 89aad, 90aad,91aad, 92aad iyo 93aad ee Xeerka Ismaamulka Gobollada Iyo Degmooyinka ee Xeer Lr.23/2019 u soo diyaarsan doonaan ku talagallada sannad misaaniydeedkooda, waxayna u soo gudbin doonaan Wasiirka Maaliyadda, si uu u hubiyo qodobbadan soo socda:
   b. In odoroska miisaniyadda loo soo diyaariyey si'waafaqsan xeerkan, Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka habraacyada diyaarinta miisaniyadda Qaranka iyo xeerarka kale ee dhaqan galka ah.

t. In odoroska miisaniyadda lagu ansixiyey cod hal dheeri ah fadhi ka mid ah fadhiyada caadiga ah ama fadhi aan caadi ahayn ee Goluhu qabsado, isla markaasna go'aanka fadhigaa lagu ansixiyey lagu soo lifaaqay.

j. In dhammaan warbixinaha iyo xogaha kale ee loo baahdo lagu lifaaqo odoroska la soo gudbiyey.

x. Haddii gole deegaan ay u suurto gali waydo inuu dhammaystiro xogaha iyo macluumaadka kor ku xusan wasiirku wuxuu ku celin doonaa odoroska miisaniyadda ee kala dhiman ee uu soo gudbiyey gole deegaankaasi, isaga oo qoraal faahfaahsan ugu caddaynaaya xogaha ka dhiman.

kh. Haddii gole deegaan aanu ansixin odoroska miisaniyadda wakhtiga lagu xusay xeerka, isla markaana uu dhammaado sannad maaliyadeedku lana galo sannad maaliyadeedka cusub waxay si ku meelgaadh ah u isticmaalayaan miisaniyaddii sannadkii dhammaaday, iyada oo guddi ka kooban wasaaraddaha Maaliyadda iyo wasaaradda qaabilsan dawladdaha hoose ay darsi doonaan sababta dib u dhaca miisaniyaddaas, kaddibna talabixin khusaysa arrintaa u soo gudbin doonaan guddida dhaqaalaha ee Golaha, iyada oo guddidu kaddib markay deristo talabixintaas u gudbin doonta Golaha, si uu go'aan uga soo saaro arrintaas.

D. Xubnaha guddida ka imanaysa hay'adaha ku xusan xarafka "kh" waxay noqonayaan 5 xubnood oo ka kala imanaya, 3 xubnood oo Wasaaradda Maaliyadda iyo 2 xubnood Wasaaradda Dawladdaha Hoose ka masuulka ah.

3. Markuu helo wasiirku odoros miisaaniyadeedyada hay'adaha dawladdu u soo gudbiyaan, wuxuu xaqiijin doonaa in odoros miisaaniyadeedyadu waafaqsan yihiin wareegtadii miisaaniyadda, si uu waajibkan u guto, wasiirku wuxuu la kulmi karaa hay'adaha dawladda si uu ugala xaalo odoros miisaaniyadeedyada ay soo gudbiyeen.

4. Wasiirku wuxuu isu gayn doonaa odorosyada hay'adaha dawlada dhexe, dawladaha hoose, kuwa madaxa bannaan iyo deeqaha, mashaariicaha ama taageerada dhaqaale ee qaadhaan bixiyayaashu ku taageeraan dalka, wuxuuna diyaarin doonaa:

   b. Qoraalka odoroska miisaaniyad sannadeedka Qaranka oo ka koobnaan doona miisaaniyadda dawladda dhexe, miisaaniyadda dawladaha hoose iyo miisaaniyadda hay'adaha madaxa bannaan.

   t. Mashruucsharciga xeerka qoondaynta miisaaniyadda ee miisaaniyad sannadeedka ku suxan xarafka (b) ee faqraddan 4aad ee qodobkan.

5. Wasiirku ka hor muddada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan wuxuu:

   b. U gudbin doonaa Golaha Wasiirrada, si ay u ansixiyaan go'aanna uga gaadhaan odoroska miisaaniyadda Qaranka iyo qoraallada lagu saleeyey odoroska miisaaniyadda si'waafaqsan qodobka 8aad faqraddiisa 9aad, qodobka 11aad faqraddiisa 3aad iyo qodobka 12aad faqraddiisa 1aad xarfaheeda B iyo T ee xeerkan.

   t. Marka uu Golaha Wasiirradu ansaxiyo odoroska miisaaniyadda Qaranka, wuxuu diyaarin doonaa mashruuucsharci miisaaniyadeedka miisaaniyad sannadeedka Qaranka.

6. Haddii ay iska hor yimaaddaan qodob ama qodobbo ka mid ah xeerkan iyo Xeerka Ismaamulka Gobollada & Degmooyinku Xeer Lr 23/2019, waxa la dabbaqayaa qodobka ama qodobbada xeerkan.

## Qodobka 13aad

## Habraaca Dejinta Miisaniyadda Golaha Wakiillada

Iyada oo la raacayo halbeegyada iyo tilmaamaha ay wasaaraddu u dejisay diyaarinta odoroska Miisaniyadda Qaranka ee ku xusan xeerkan gaar ahaan qodobbada 10aad iyo 11aad, hannaanka loo qaabaynayo miisaaniyadda Golaha waxa loo raacaya:

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa diyaarin doonaa odoroska miisaniyad sanandeedka Golaha.
2. Marka Guddoomiyuhu ku gudo jiro, waxa hubin doona in misaaniyadda Goluhu tahay mid ka turjumaysa halwaha shaqo ee Guddiyada Golaha ee ay ka mid yihiin xeerdejinta, korjoogtaynta halwaha qaranka iyo fullinta sharciyada.

3. Miisaaniyadda Goluhu waxay ka koobnaan doontaa misaaniyadda maamul ee shirguddoonka iyo miisaaniyadda hawlaha shaqo ee guddiyada Golaha.
4. Guddoomiyuhu muddada uu ku gudo jiro diyaarinta odoroska miisaniyad sannadeedka waxa uu la tashan doonaa shirguddoonka Golaha.
5. Kaddib marka guddoomiyuhu dhammaystiro diyaarinta odoroska miisaniyad sannadeedka, waxa uu u gudbin doonaa guddida hawlaha Golaha, muddo aan ka dambayn 15 August ee sanad miisaaniyadeed kasta, iyada oo guddidu hubin doonta in miisaaniyadda Golaha loo diyaariyey si'waafaqsan habraacyada diyaarinta miisaaniyaddaha ee ku xusan xeerkan.
6. Guddida hawlaha Goluhu waxay ka doodaysaa, isla markaana dib u eegis iyo wax kabeddel ku samayn karaan miisaniyadda Golaha, iyagoo la tashanaya xafiiska miisaniyadda iyo dhaqaalaha ee Golaha.
7. Kaddib marka ay guddida hawlaha dhammaystirto, dib u eegista, wax kabeddelka iyo doodda odoroska miisaniyad sannadeedka waxa ay u gudbin doonaan wasaaradda, muddo aan ka dambayn 31-ka August si loogu daro xeerka miisaniyadda ee loo gudbinaayo Golaha Wasiiradda iyo Golaha Wakiillada.
8. Miisaaniyadda Golaha Wakiilada waxa si toos ah looga bixinayaa kaydka dakhliga guud, waxaana waaran (warrant) saddex biloodle ah loogu oggolaanayaa miisaaniyaddooda.

## Qodobka 14aad
## Gudbinta Odoroska Miisaaniyadda

1. Madaxweynuhu wuxuu, kaddib marka uu ansaxiyo Golaha Wasiirradu, **15ka bisha Oktoobar** ee sannad kasta Golaha Wakiillada u gudbin doonaa qoraaladan soo socda.
   b. Mashruucsharci ee miisaniyadda odoroska Qaranka.

   t. Qoraallada lagu saleeyey odoroska miisaaniyadda
   j. miisaaniyadda loo soo diyaariyay.
2. Waxa kale oo uu Madaxweynuhu xaqiijin doonaa in loo gudbiyay lagana horjeediyo Golaha warbixinaha iyo qoraalladan soo socda:
   b. Warbixinta miisaaniyadda oo kooban oo ay ku jirayaan:

      i. Siyaasadaha iyo saadaalaha maaliyadda gaar ahaan dakhliga, kharashka, daymaha iyo daboolidda isdhinka miisaaniyadda.

      ii. Faahfaahinta sida miisaaniyaddu uga turjumayso mabaa'diida masuuliyadaha maaliyadeed iyo ujeeddooyinka/ siyaasadda maaliyada.

      iii. Warbixin wasiirku ku faahfaahinayo sida xukuumaddu u tixgalisay uguna dhaqantay tala soojeedinta Golaha Wakiillada ee ku xusan faqradaha 5aad ee qodobada 8aad iyo 10aad ee xeerkan.

   t. Qoraalka odoroska miisaaniyadda Qaranka oo u qaybsan miisaaniyadda dawladda dhexe, miisaaniyadda Dawladdaha hoose, iyo Hay'adaha madaxa banaan.

3. Waxa mar kasta waajib ah xogaha odoroska miisaniyadda ee loo gudbinayo Golaha wakiiladda in ay waafaqdo xogaha lagu faahfaahiyay xeerkan
   b. Wadarta odoroska dakhli iyo kharash ee dawladda dhexe.

   t. Liiska hay'adaha dawladda dhexe ee loo qoondeeyey miisaaniyadda.

   j. Qoondayn miisaaniyadeedka miisaaniyadda qaranka looga qoondeeyey laguna wareejin doono dawladaha hoose.

   x. Odorosyada kharashaadka hay'ad kasta ama mashruuc kasta oo ka tirsan dawladda dhexe, iyadoo si cad loo kala muujinayo kharaashaadka hawl fulinta iyo mashaariicda oo gobolaysan.
   Kh. Wadarta guud ee odoroska deeqaha dawladdu filayso iyo ilaha laga filayo.

   d. Odoroska isdhinka ama dheeraadka miisaaniyadda ee muddada dhexe iyo soojeedinta ilaha maalgelin laga filayo.

r. Warbixinaha odoroska daymaha iyo amaahda dawladda oo ay ku jiran faa'iidooyinka iyo takaalifta daymaha ee ay heli doonto dawladdu sannadkaas oo waafaqsan shareecada Islaamka.

s. Warbixnaha amaahda ay qaadatay iyo dammanadaha ay bixisay dawladdu oo koobsanaya raasamaalka, faa'iidooyinka iyo kharashaadka amaahda iyo damaanadaha ee ay dawladdu bixin doonto sannad miisaaniyadeedka.

sh. Warbixin wasiirku ka diyaariyo tallaabooyinka ay dawladdu qaadday iyo sida ay u fulisay talabixinnadii Golaha Wakiilladu soojeediyey ee sannad miisaaniyadeedkii kal hore. i

dh. Miisaaniyadda dawladaha hoose oo muujinaysa wadarta guud ee dakhliga iyo kharashka guud ahaan dawladaha hoose, wadarta dakhliga iyo kharashka dawladda hoose oo kasta

c. Wadarta iyo nooca miisaanyadda ay dawladda dhexe u qoondaysay kuna wareejinaysa dawlad hoose oo kasta.

4. Wasiirku, markuu diyaarinayo mashruucasharci sannad miisaaniyadeedka, wuxuu xaqiijin doonaa in qoondayn kharasheedyada iyo odoroska dakhli ee sannad miisaaniyadeedka loogu muujiyo mashruucsharci miisaaniyadeedkaas.

   f. Si sax ah oo cad oo lafahmi karo, taasoo u shaxaysan si'waafaqsan heerarka hubsiimo ee la aqoonsan yahay.

   q. Si cad u qeexaysa una kala saaraysa qoondeymaha kharashaadka hay'ad kasta loo qoondeeyey iyo mashaariicaha iyo hawlaha loo qoondeeyey kharashkaas.

5. Nooca xogaha loo gudbinaayo waxa lagu faahfaahinayaa xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah iyadoo xog kasta oo loo baahdo ay waajib ku tahay inuu wasiirku la wadaago Golaha Wakiillada.

## Qodobka 15aad

## Dabciga, Ansixinta iyo Dhaqangalinta Miisaniyadda

1. Odoroska miisaniyadda oo yeelanaysa dabciga mashruucsharci maaliyadeed, Golaha Wakiilladu waxay lafaguri doonaan odoroska miisaaniyadda Qaranka ee uu wasiirku u soo gudbiyey, waxaanay ansixin doonaan odoroska miisaaniyadda iyo mashruucsharci miisaniyadeedka miisanayad sannadeedkaas, waxay ugu dambayn dhammaadka bisha Diisamber ee sannad kasta, mashruucsharci miisaaniyadeedka ay ansixiyeen u gudbin doonaan Madaxweynaha si uu u dhaqangeliyo.
2. **Guddiga dhaqaalaha iyo maaliyadda ee Goluhu, waxay awood u leedahay in ay u yeedho Wasiirka Maaliyadda si ay wax uga weydiiyaan odoroska miisaaniyadda loo soo gudbiyey.**
3. Golaha Wakiilladu waxa uu wax kabeddel iyo soojeedimo ku samayn karaa odoroska miisaniyadda ee loo soo gudbiyey isaga oo wax kabeddelkaas iyo soojeedimahaas ku ansixinaya go'aan gole.
4. Miisaaniyadda Qaranka ee Golaha Wakiillada loo gudbinayo waa inay weheliyaan warbixinahan: -

   b. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan macluumaad kasta oo la xidhiidha dakhliga iyo kharashka.

   t. Sababaha korodh kasta ama dhimis kasta oo dakhli ama kharasha.

   k. Siyaasadda miisaniyadda (Budget Policy) ee xukuumadda ee sannad maaliyadeedkaas.

   x. Warbixinta daymaha qaranka iyo faahfaahintooda.

   kh. Warbixinta deeqaha qaran ee la helay, kuwa la filaayo in la helo iyo qorshaha lagumaamuli doono.

   d. Warbixinta dhigaalka qaranka.

   r. Warbixinta mashaariicda horumarineed ee qaranka.

s. Tixraaca xeerarka lagu jideeyay, haddii ay miisaaniyadda ku jiraan, jidayn, dhimis ama korodh cashuur, takaaliif ama khidmado aan sannadaha hore ku jirin oo sharci gole loogu jideeyey si'waafaqsan qodobka 14aad, faqraddiisa 2aad iyo qodobka 54aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Qaranka.

sh. Tixraaca xeer ee lagu dhisay, haddii ay miisaaniyadda ku jiraan, hay'ado, maamulo, xafiisyo, guddiyo, komishanno iyo wakaalladdo cusub oo aan miisaaniyadda hore ugu jirin, xeerkaas oo faahfaahinaya aasaaska, qaabdhismeedka, xilka iyo waajibaadka shaqo ee hay'addaas, guddidaas, komishankaas, wakaalladdaas, xafiiskaas ama maamulkaas.

dh. Warbixinta faa'iidada ama khasaaraha hay'addaha madaxa bannaan ee dakhliga sameeya iyo kuwa dawladdu wax ku leedahay ee wadaaga ah.

c. Qorshe sanadeedka hay'ad kasta.

g. Iyo macluumad kasta oo kale oo Goluhu uga baahdo hay'ad, wasaarad, guddi, komishan, xafiis, mashruuc iyo maamullada dawladdaha hoose.

5. Haddii ay xukuumaddu rabto inay iibiso hanti ma'guurto (fixed asset) ah isla sannad maaliyadeedkaas waxay xukuumaddu marinaysaa nidaamka qandaraas ee dalka iyada oo warbixinta xisaab xidhka ku caddaynaysa dakhli ahaan iyo kharash ahaanba.

## Qodobka 16aad

## Kaabis Miisaaniyadeedka

1. Haddii sannad maaliyadeed gaar ah, ay soo baxdo in xaddiga miisaaniyadda uu qoondeeyey Xeerka Miisaaniyadu aanu ku filayn ama ay soo baxdo baahi aan wax miisaaniyad ah loo qoondayn ama dakhli dheeraad ahi soo hoydo, odoros kaabis ah oo muujinaya xaddiga kharash miisaaniyadeedka lagama maarmaanka u ah daboolidda baahida kharash ee soo baxday ayaa la horgayn doonaa Golaha Wakiillada.
2. Markay yimaaddaan xaaladaha lagu sheegay faqradda hore ee qodobkan, wasiirku waa inuu u gudbiyo Golaha Wakiilladda qabyo qoraalka kabka miisaaniyadda marka:
   - b) La kordhinayo kharashka guud ee miisaaniyadda asalka ah ee Qaranka.
   - t) La wareejinayo caddad lacageed oo ku jiray hay'ad oo hay'ad kale loo wareejinayo oo ka mid a miisaaniyadda asalka ah ee Qaranka ee lagu faahfaahiyey qodobka 18aad ee xeerkan.
   - J) La'abuuro qoondo cusub oo aan hore ugu jirin miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah ama in la bedelo ujeedada qoondada ee Miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah.
   - X) Wax kabeddel weyn lagu sameeyo ku talaggalka dakhliga ee asalka miisaaniyadda Qaranka oo isdhimis baaxad leh ku samaynaysa dhammaan kharashyada miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah.
3. Miisaaniyadda kabku waxay kordhin kartaa wadarta kharashyada ku xusan asalka miisaaniyadda Qaranka, haddii ay jirto xaalad gurmad Qaran oo degdeg ah, dagaal ama xaalad kale oo dhaqaale iyo maaliyadeed oo aan hore looga sii war qabin ama loo saadaalin.
4. Wasiirku wuxuu ugu gudbin doonaa Golaha Wakiiladda qabyo qoraalka miisaaniyadda kabka ah sida lagu tilmaamay qodobka 21aad faqradihiisa 4aad, 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad ee xeerkan, waana in ay ku jirto sababaha miisaaniyadda kabka ah loogu baahan yahay.
5. Marka la kordhiyo wadarta kharashyada ama hoos loo dhigo wadarta dakhliga, waxa la soo raacinayaa warbixin faahfaahsan oo tilmaamaysa ilaha maaliyadeed iyo saamaynta ay ku yeelaneyso saadaasha maaliyadeed ee uu hore u ansixiyey Goluhu.
6. Hay'adaha dawladdu markay codsanayaan lacag dheeri ah waa inay u maraan kabid miisaaniyadeedka si'waafaqsan wareegtada uu soo saaray wasiirku ee diyaarinta miisaaniyadda kabka.
7. Marka dakhliga soo galay uu ka bato qiyaastii miisaaniyadda qaranka ee la filayey, dakhliga dheeriga ah looma isticmaali karo kharash ahaan iyada oo aan laga haysan ogolaansho lagu ansixiyay go'aan gole.

8. Waxa ka reebban dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladda heer kasta ha ahaadaane in ay bixiyaan kharash dheeri ah ama ay galaan kharashyo aan miisaaniyadda asalka ah ku jirin ama aan ku jirin miisaaniyadda kabka ah ee ee Goluhu ansixiyey.

9. Diyaarinta, ansixinta iyo fulinta miisaaniyadda kaabista ah waxa lagu maamuli doonaa qodobbada lagu maamulo ansixinta iyo fulinta miisaniyad sannadeedka caadiga ah.

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

## Qodobka 17aad
## Kharashyada Qarsoodiga ah

1. Waxa waajib ku ah dawladda inay sannad walba u qoondayso miisaaniyad gaar ah oo qarsoodi ah, si loo tayeeyo saanadda ciidamada qaranka, sarena loogu qaado xaaladda amni ee dalka, si ay ciidamada qaranku u gudan karaan waajibaadkooda dastuuriga ah ee difaaca iyo sugidda amniga qaranka, kharashkaas oo ay maamul ahaan maamuli doonaan hay'adaha difaaca, amniga iyo Madaxtooyadda Qaranku.

2. Iyadoon waxba loo dhimayn nidaamka daahfurnaanta miisaaniyadda qaranka, qoondada miisaaniyadeed ee loo qoondeeyey difaaca iyo amniga qaranka waxa si guud caddad ahaan loogu muujin doonaa odoroska miisaaniyad sannadeedka, balse faahfaahinteedu waxay noqon doontaa mid qarsoon oo sir ah. Xiliga lagu gudo jiro ansixinta miisaaniyad sannadeedka, Golaha Wakiiladu doodaha ay ka yeelanayaan faahfaahinta miisaaniyadda loo qoondeeyey difaaca iyo amniga qaranka uma furnaan doonaan shacabka iyo warbaahinta toona, si waafaqsan qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka iyo xeerhoosaadka Golaha.

4. Wasiirka Maaliyadda ayaa faahfaahinta miisaaniyadda difaaca iyo amniga qaranka si gaar ah ugu soo gudbin doona Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, isagoo isna qabanqaabin doona kulan xidhan oo ay ka yeeshaan guddida hawlaha Goluhu lafagurka miisaaniyadda difaaca iyo amniga.

5. Sida ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan falaqaynta ku saabsan faahfaahinta miisaaniyadda difaaca iyo amniga qaranka ee Golaha wakiiladdu waxay noqon doonaan qaar ka xidhan dadweynaha iyo warbaahintaba si'waafaqsan qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka iyo xeerhoosaadka Golaha.

6. Saraakiisha fulinta ee wasaaradda ama hay'adaha loo qoondeeyey kharashaadka difaaca iyo amniga qaranka ayaa si'waafaqsan halbeegyada iyo habraacyada xisaabta ee uu soo saaro Xisaabiyaha Guud u taabbagalin doona nidaamka xakamaynta gudeed oo ku habboon maamulka dhaqdhaqaaqa iyo isticmaalka kharashaadkaa qoondadaas difaaca iyo amniga Qaranka.

7. Wasaaradaha iyo hay'adaha faqradda sare ee qodobkan lagu soo sheegay waxa waajib ku ah inay warbixin kusaabsan isticmaalka kharashaadka lagu soo sheegay faqraddaha sare ee isla qodobkan u gudbiyaan iyagoo saddex biloodle iyo sannadle ah Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.

8. Xisaab xidhka kharaashaadka lagu soo sheegay faqradaha hore ee qodobkan, waxa diyaarin doona Xisaabiyaha Guud, isla markaana wuxuu u gudbin doonaa Hantidhawraha Guud ee Qaranka. Hantidhawraha Guudna wuxuu ka gudan doonaa waajibaadkiisa baadhiseed isagoo warbixina ka diyaarin doona, una gudbin doona Madaxweynaha iyo Golaha Wakiillada si'waafaqsan xeerkan, Xeerka Hantidhawrka Qaranka iyo Dastuurka.

9. Xisaab xidhka iyo warbixinta Hantidhawrka ee kharashaadkan ku tilmaaman faqradaha xeerkan, gudbintooda iyo dooddoodaba waxa loo mari doonaa habka loo maray marxaladdii miisaaniyadda ee ku tilmaaman faqradaha 2aad iyo 3aad.

## Qodobka 18aad
## Kaydka Dhigaalka Qaranka

1) Waxa xeerkan lagu aasaasay kaydka dhigaalka Qaranka oo noqon doonta qoondo xisaabeed oo uu leeyahay Qaranku, sida uu jideeyay qodobka 54aad faqradda 2aad ee Dastuurka

Jamhuuriyadda Somaliland. Waxa ku dhici doona ama lagu kaydinayaa oo noqonaya kaydka dhigaalka Qaranka xisaabahan:

b). Ugu badnaan shan boqolkiiba (5%) wadarta guud ee odoroska dakhliga miisaaniyadeedka sannad kasta.

T). Deeqaha aan qorshaysnayn kuna jirin miisaaniyadda ee Qaranku helo sannadka dhexdiisa

J). Faa'iidada ka soo xaroota shirkadda dawladdu leedahay ama qaybta ka tahay ee aan ku jirin miisaaniyadda.

2) Ujeeddada aasaaska kaydka dhigaalka Qaranka:

b). In la helo kayd guud oo dhaqaale oo qaranku leeyahay kuna xidhnayn sannad miisaaniyadeed oo si joogta ah u jiri doona.

t) In la helo kayd dhaqaale oo laga bixin karo gurmadka iyo xaaladaha degdegga ah ee aan miisaaniyadda ku jirin ama ka baaxad weyn gurmadka ku jira miisaaniyadda.

j). In la helo dhaqaale buuran oo mustaqbalka laga maalgelin karo danaha horumarineed ee qaranka u danta ah.

x). In la helo kayd dhigaal oo laga sii isticmaali karo horumarinaha hawlaha dawladeed ee sannad miisaaniyadeedkaas laga dabooli karo.

3) Kaydka dhigaalka Qaranka, lagama bixin karo lacag aanu oggolaan Golaha Wakiilladu.

4) Marka si'waafqsan faqradda 3aad, xarafkeeda "X" ee qodobkan lacag horumarin ah loo baahdo ama ay timaaddo xaalad degdeg ah, waasiirku wuxuu degdeg u diyaarin doonaa isla markaana baahidaas oo sababaysan una gudbin doonaa Golaha Wakiillada.

5) Xaaladaha degdeg ah ee isticmaalka kaydka dhigaalka Qaranka.

b. Haddii Golaha Wakiiladu uu ku jiro fasax, isla markaana dalabka wasaaradda maaliyaddu aanu ka badnayn boqolkiiba konton (50%) lacagta sanad miisaaniyadeedkaas loo qoondeeyay inay ku dhacdo kaydka dhigaalka, waxa isaga oo gole waynaha ka wakiil ah ansixinaya gudidda joogtada ah ee Golaha kaddib markay helaan soojeedinta guddida dhaqaalaha.

t. Haddii Golaha Wakiilladu uu ku jiro fasax, isla markaasina dalabka wasaaradda maaliyaddu ay ka badantahay boqolkiiba konton (50%) lacagta sanad miisaaniyadeedkaas loo qoondeeyay inay ku dhacdo kaydka dhigaalka, waxa waajib ah in Golaha la isugu yeedho kalfadhi degdeg ah oo aan caadi ahayn, marka gudidda dhaqaaluhu ku qanacdo baahidaasi.

7) Xaaladaha degdeg ah ee isticmaalka kaydka dhigaalka Qaranka.

b. In Xukumaddu ku soo darto mashaariic maalgalineed/horumarineed oo ku jirta miisaaniyadda xilliga ansixinta miisaaniyadda oo loo raaci doono nidaamka ansixinta miisaaniyadda.

t. In lagu keeno kaabis oo loo raaci doono nidaamka ansixinta kabka iyada oo la tixgelin doono qodobka 6aad ee xeerkan ee lagu xaddiday qaddarka.

J) Mashaariicda/maalgelinta laga dalbanayo kaydka dhigaalka guud waa inay noqdaan kuwo lagu sameeyay daraasad buuxda oo saamayn mug leh ku yeelanaya nolosha iyo dhaqaalaha bulshada, isla markaana aan ka badnayn boqolkiiba konton (50%) wadarta kaydka dhigaalka guud ee Qaranka.

8) Ilaalinta iyo korjoogtaynta kaydka dhigaalka guud ee Qaranka.

b. Dhammaan hay'adaha ay ka mid yihiin Xisaabiyaha Guud, Hantidhawraha Guud iyo guddiyada maaliyadda iyo dabagalka hantida Qaranka, waxay ku leeyihiin door korjoogtayn ah.

t. Ku xadgudubka kaydka guud ee Qaranka waxa uu noqon doonaa denbi Qaran oo masuuliyad culusi ka dhalan karto.

## Qodobka 19aad

## Kala wareejinta Qoondaymaha Miisaaniyadda

1. Kala wareejimahaasi waxay noqon karaan:
   b. Qoondayn miisaaniyadeed kharash hawlfulineed/joogto ah laguna wareejiyo qoondayn kharash hawlfulineed kale ama qoondayn kharash mashaariiceed kale oo isla hay'ad dawladeed ah.
   t. Qoondayn miisaaniyad mashaariiceed loona wareejiyo qoondayn misaaniyad mashaariiceed kale oo isla hay'ad dawladeed ah.
   j. Qoondayn miisaaniyadeed oo loo qoondeeyey hay'ad dawladeed in loo wareejiyo hay'ad kale oo dawladeed.
2. Hay'adda dawladdadeed ee soo codsata kala wareejin waxaay Wasiirka Maaliyadda us oo gudbin doontaa:
   b. Faahfaahin dhammaystiran oo muujinaysa lacagaha ama madaxyada laysku wareejinaayo.
   t. Codsi qoraal ah oo sababaysan oo uu ku saxeexan yahay madaxa hay'adda dawladeed ee ay khusayso.
3. Kaddib marka hay'adda dawladdeed u soo gudbiso xogaha ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan, wasiirku wuxuu hubinayaa:
   b. In lacagaha qoondaymaha laga wareejinayaa ay yihiin lacago u muuqda in aan la isticmaali doonin sannad maaliyadeedkaas.
   t. In lacagta la wareejinayaa aanay ka badnayn 50% wadarta qoondayn miisaaniyadeedka lacagta laga wareejinayo.
4. Waxa reebban in: -
   b. Qoondayn miisaaniyadeed mashruuc loo wareejiyo hawlfulin/hawl socodsiin
   t. Qoondayn miisaaniyadeed mushahar loo wareejiyo kharash kale oon kharash mushahaaro ahayn.

## Qodobka 20aad

## Dib U Eegista Fulinta Miisaaniyadda

Wasiirku wuxuu, isagoo latashanaya hay'daha fulinaya miisaaniyadda, sannadkiiba hal mar oo noqonaysa bisha lixaad gudaheeda dib u eegis ku samayn doonaa fulinta iyo isticmaalka miisaaniyadda (fiscal progress): -

1) Si loo qiimeeyo guulaha laga gaadhay hadafyadii iyo mashaariicdii (outputs) sannad maaliyadeedka.
2) Si la isula meel dhigo tallaabooyinka lagama maarmaan loogu arko habsamida fulinta sannad miisaaniyadeedka, sida dib u habaynta (readjustment) habdhiska kharashaadka muddada dhexe iyo meelmarinta kab miisaaniyadeed (supplementary budget) ama kala wareejin miisaniyadeed, haddii loo baahdo.
3) Wasiirku waxa uu u gudbin doonaa Golaha Wakiillada warbxinta dib u eegista sannadlaha ah ee fulinta miisaaniyadda bisha 31-ka August ee sannad kasta taasoo ay la socoto lafagurka dakhliga la ururshay iyo isticmaalka kharashka ee lixda bilood ee hore ee sannad maaliyadeedka, haddii ay lagama maarmaan noqotana wuxuu soojeedin doonaa miisaaniyad kab ah si uu u ansixiyo Golaha Wakiilladu.

## Qodobka 21aad

## Dhammaadka Dhaqangelinmida Qoondayn Miisaaniyadeedka

1) Marka sannad maaliyadeedku dhammaado, dhammaan hay'adaha miisaaniyadlayaasha wixii ka **danbeeya 25 December** waxa ka reebban inay isticmaalaan lacagaha qoondaymo kharashaadyada aanay kharashgarayn ka hor dhammaadka sannad maaliyadeedka.
2) Dhammaan kharash miisaaniyadeedyada noocaas ahna waxa lagu celin doonaa oo ay ka mid noqonayaan xisaabta **kaydka dhigaalka Qaranka,** marka laga reebo xaaladaha ay dhigayaan faqradaha 3aad iyo 4aad ee qodobkan.

3) Iyadoo ay sideeda ahaanayso faqradda 1aad ee qodobkan, lacagta qoondayn kharasheedka aan la siticmaalin waxa lagu hayn doonaa qoondo gaar ah, kuwaas oo aay ka mid noqonayaan
   b. Deeqaha qorshaysan
   t. Daymaha qorshaysan
   j. **Kharshaadka la galay ee curaarta la galiyay.**
4) Ujeeddooyinkii loogu talaggalay: Waxa bannaan in, kaddib dhammaadka sannad maaliyadeedka, muddo 30 casho ah la sii isticmaalo qoondayn kharasheedyada, si loo bixiyo qaansheegashooyinka iibka alaabooyinka iyo adeegyada ama bixinta deymaha bixintoodu taagan tahay.

## QAYBTA AFRAAD
## KOR-JOOGTEYNTA GOLAHA WAKIILADA EE DEJINTA MIISAANIYADDA IYO MAAREYNTA MAALIYADDA

### Qodobka 22aad

### Awoodaha Golaha Wakiilada ee Dejinta iyo Ansixinta Miisaaniyadda Qaranka

1. Sida ku qeexan mab'da ahaan qodobka 55aad ee Dastuurka JSL, Golaha Wakiilladu waa Golaha leh awoodda ugu sarraysa ee go'aan ka gaadhidda iyo ansixinta miisaaniyadda Qaranka.
2. Si waafaqsan qodobka 55aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka, waxay xukuumaddu u gudbinaysaa odoroska miisaaniyadda Golaha Wakiiladda, si uu uga doodo, wax kabeddelna ugu sameeyo haddii ay muhiim ula muuqato, ugu dambayntana uu ugu ansixiyo go'aan gole.
3. Haddii ay timaaddo baahi lagama maarmaan ah oo aan laga baaqsan karayn ama xaalad maangal ah oo khasbaysa in wax kabeddel lagu sameeyo miisaaniyadda loo qoondeeyey haayadda ama wasaaradda waxa waajib ah inay sidaasi ku wargaliyaan Wasaaradda Maaliyadda, wasaaradduna waxay u gudbin doontaa golaha xukuumadda.
4. Golaha xukuumaddana waxa waajib ku ah inay u soo gudbiso Golaha Wakiillada si ay oggolaansho uga hesho, Goluhuna wuxuu ku oggolaan doonaa go'aan gole, kaddib markuu derso ee uu dood ka yeesho sababaha loo cuskaday wax kabeddelka miisaaniyadda ee Golaha loo soo gudbiyey, si'waafaqsan qodobka 55aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka.
5. Haddii ay yimaaddaan xaalado khatar ku ah dhaqaalaha dalka ama duruufo adag oo kale oo aan laga baaqsanayn in miisaaniyadda ay xukuumaddu wax kabeddel ku samayso, waxa loo raacayaa hannaanka faqradaha 4aad iyo 5aad ee qodobbadani ay dhigayaan.
6. Si'waafaqsan qodobka 55aad, faqraddiisa 3aad ee Dastuurka, haddii ay xukuumaddu u baahato inay gasho kharashaad aan miisaaniyad sannadeedkaas lagu jiro aan ku jirin, waxa waajib ah in ay u soo gudbiso ka hor inta aan kharashkaas la galin Golaha Wakiiladda, si ay oggolaansho uga hesho, Goluhuna wuxuu u raaci doonaa anxsixinta kharashkaas, si'waafaqsan faqradda 5aad ee qodobkan.
7. Si'waafaqsan qodobka 55aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka, haddii ansixinta miisaaniyadda cusubi dhammaan weydo ka hor bilowga sannad maaliyadeedka cusub, si looga baaqsado inay istaagto shaqada dawladdu waxa si ku meel gaadh ah loogu sii dhaqmi doonaa miisaaniyaddii hore intay ka soo baxayso miisaaniyadda cusubi.
8. Xaaladda ku tilmaaman faqradda 8aad, waxa miisaaniyadda lagaga dhaqmayaa kharashaadka hawlsocodsiinta iyo mushaharaadka oo kaliya saddex biloodka (quarterka) ugu horreeya sannad miisaaniyadeedka.
9. Miisaaniyadda kabka (Supplementary budget) waxay xukuumaddu u soo gudbin doontaa Golaha Wakiillada, Goluhuna wuxuu u raaci doonaa ansixintiisa, sida ku cad faqradda 5aad ee qodobkan.
10. Xukuumadda waxa ka reebban inay gasho kharash aanu oggolaan Golaha Wakiilladu.

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA J.SOMALILAND

11. Xaaladaha kala duwan ee lagu xusay faqradaha sare ee qodobkan iyo qodobka kale ee 7aad faqraddiisa 2aad, xarafkeeda "b" iyo faqradda 3aad ee horseedi kara in miisaaniyadda wax kabeddel lagu sameeyo ama la hakiyo qayb ahaan ama gebi ahaanteedba kaddib markay xukuumaddu kasoo codsato Golaha, waxa Golaha Wakiillada isna ku waajib ah inuu si muglehu derso jiritaanka iyo saamaynta xaaladahaas, isagoo isla markaana mudnaan gaar ah siinaaya, si looga baaqsado inay dawladdu ku guuldarraysato inay ka hor tagto ama wax ka qabato, saamaynaha xaaladahaas khatarta ku noqon kara Qaranka iyo xilgudashada hay'adaha kala duwan ee dawliga ahba.

## Qodobka 23aad
## Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga

Guddida dhaqaalaha, maaliyadda iyo ganacsiga ee Golaha Wakiilladu waxay, ka sakow masuuliyadaha kale uu u xilsaaro xeerhoosaadka Goluhu, u xilsaaran yihiin arrimahan soo socda:

1. Qiimaynta habdhiska miisaaniyadda iyo siyaasadda maaliyadda ee xukuumaddu u soo gudbiso Golaha Wakiillada iyo inay Golaha u soo gudbiyaan warbixin iyo talabixinno ku aaddan habdhiska miisaaniyadda iyo siyaasadda maaliydeed.
2. Lafagurka iyo qiimaynta odoroska miisaaniyadda dakhli iyo kharash iyo masruucsharci miisaaniyadeedka, miisaaniyad sannadeedyada dawaladda iyo inay Golaha u soo jeediyaan talabixin iyo soojeedimo Golaha ka caawiya ansxinta mashruucsharci miisaaniyadeedka.
3. Hawlaha kale ee uu u xilsaaro xeerkan ama xeernidaamiye ka farcama ama xeer kale oo dhaqangal ah ama Golaha Wakiillada.
4. Kormeeri doontaa goobaha dakhli, arrimaha dhaqaalaha, maaliyadda, ganacsiga, mashaariicaha horumarineed iyo miisaaniyadaha dawladaha hoose ee dalka.
5. Soo saari doontaa hagayaal iyo habraacyo lagu kormeeri doono xaaladaha maaliyadeed iyo kuwa dhaqaale ee dalka.
6. Lafagurka, hubinta, falanqaynta iyo dib u eegista miisaaniyadda Golaha Wakiillada.

## Qodobka 24aad
## Xafiiska Miisaaniyadda iyo Dhaqaalaha ee Golaha (Parliamentary Budget Office)

1. Golaha Wakiilladu wuxuu yeelan doonaa xafiiska miisaaniyadda iyo dhaqaalaha.
2. Xafiiska miisaaniyadda iyo dhaqaaluhu wuxuu ka koobnaan doonaa xubno khuburo ah, isla markaana waayo'aragnimo shaqo u leh arrimaha dhaqaalaha, maaliyadda iyo miisaaniyadda, kuwaas oo uu hoggaamiyo Agaasimaha Xafiiska Miisaaniyadda & Dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada.
3. Xafiiska Miisaaniyadda & Dhaqaalaha Goluhu wuxuu u xil saaranyahay:

   **b.** Inuu Golaha Wakiillada ka caawiyo lafagurka, falanqaynta iyo ka talabixinta siyaasadaha dhaqaalaha iyo maaliyadda ee dalka

   **t.** Inuu ka talabixiyo odoroska miisaaniyadda Qaranka iyo xogaha kale ee la xidhidha miisaniyadda.

   **j.** Qiimeeyaa warbixinna ka diyaariyaa mashaariicaha horumarineed.

   **x.** Ka talabixiyaa xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee dalka.

   **kh.** Warbixinno ka diyaariyaa khataraha soo wajihi kara dhaqaalaha dalka.

   d. Lafaguraa isla markaana ka talabixiyaa xisaab xidhka Qaranka.

   r. Ku matalaa Golaha kulannada farsamo ee la'xidhiidha ganacsiga, maaliyadda iyo dhaqaalaha.

   s. Wuxuu dersi doonaa talabixinna ka siin doonaa guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakillada mashruuc sharciyeedyada dhaqaalaha, ganacsiga, maaliyadda iyo mashruucsharci kasta oo kallifi kara korodh ama isdhin dhakhli:

   sh. Iyo hadba wixii kale ee la'xidhiidha dhaqaalaha, maaliyadda iyo ganacsiga ee ay u baahdaan guddida dhaqaalaha, xafiiska shirguddoonka Golaha, xafiiska Xoghaya Guud iyo guddi hoosaadyada kale ee Golaha.

Dh. Khubarada iyo Lataliyayaasha kala duwan ee dhaqaalaha iyo maaliyadda waxay hoos imanayaan xafiiska miisaaniyadda Golaha.

4. Xafiiska miisaaniyadda iyo dhaqaalaha ee Golaha Wakiilladu wuxuu wada shaqayn toos ah la yeelanayaa guddida dhaqaalaha, maaliyadda iyo ganacsi iyo guddida dabagalka iyo ilaalinta hantida qaranka, guddi hosaadyada kale ee Golaha iyo hay'adaha kale ee maaliyadda iyo dhaqaalaha ee dawladda iyo kuwa aan dawliga ahaynba.

## Qodobka 25aad

## Awoodaha Golaha Wakiillada ee Korjoogtaynta, Dabagalka iyo Laxisaabtanka Ee dhinaca Miisaaniyadda

1. Si'waafaqsan qodobbada Dastuurka ee kala ah 38aad, faqraddiisa 4aad, xarafkeeda (J), 53aad, faqradihiisa 2aad, 3aad iyo 6aad iyo qodobka 55aad, faqradihiisa 1aad iyo 6aad, Golaha Wakiilladu wuxuu awood dastuuri ah u leehay inuu ku dabagalo kuna korjoogteeyo, isagoo laxisaabtan dhab ah la yeelanaaya dhammaan hay'adaha dawladda, fulinta dhammaan barnaamijyada iyo siyaasadaha waxqabad ee u dejisan iyo isticmaalka maaliyadda loo qoondeeyey ee Goluhu u ansixiyey.

2. Goluhu isagoo gudanaaya waajibaadkiisa dastuuriga ah ee faqraddan sare ee qodobkan ku xusan wuxuu dusha kala soconayaa, kormeerayaa oo uu hubinayaa hannaanka ay hay'adaha dawladdu u isticmaalayaan miisaaniyadda loo qoondeeyey in ay waafaqsantahay siddii uu Goluhu ku soo ansixiyey iyo in kale.

3. Gudidda dabagalku waxay awood u leedahay inay iyadoo Golaha metalaysa ay ku dabagasho dhammaan hay'adaha Qaranka ee kala duwan mansabkay doonaan ha lahaadaane, hannaanka ay u isticmaaleen ama u kharash gareeyeen miisaaniyadda sannadeedkii dhammaaday, inuu yahay hannaankii sharciga ahaa ee uu Goluhu ugu soo ansixiyey iyo in kale, iyagoo isla markaasna ku samayn kara baadhitaan iyo hubin ay ku xaqiijinayaan arrintaas dhammaan hay'adahaas.

4. Guddiddu markay gudanayso waajibaadkan Gole, tallaabo kasta oo baadhiseed, dabagal iyo la xisaabtan oo ku saabsan miisaaniyadda oo ay qaadayso waxay la socodsiinaysaa shirguddoonka Golaha, kaas oo isna ogeysiin doona Golaweynaha si'waafaqsan xeerhoosaadka Golaha. Waxaana ka mid noqon kara tallaabooyinka ay qaadi karto guddidu: -

   B) inay daraasad iyo baadhis xeel dheer oo dib u eegiseed ku samayso, warbixin sannadeedka ku saabsan xisaab xidhka iyo warbixinaha hantidhawriseed ee uu Hantidhawraha Guud ee Qaranku ugu soo gudbiyey Golaha Wakiilladi si'waafaqsan qodobka 55aad ee Dastuurka faqradihiisa 6aad, 7aad iyo qodobka 8aad, faqraddiisa 11aad ee xeerkan iyo qodobka 35aad ee Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr/76/2016,

   T) inay Hantidhawraha Guud ee Qaranka iyo Xisaabiyaha Guudba ay u yeedhi karto xilli kasta, si'ay su'aalo uga weydiiso warbixanaha xisaab xidhiseed iyo baadhiseed ee ay warbixin sannadeedka Golaha u soo gudbiyeen xambaarsanyahay ama ay warbixinno faahfaahsan ama dheeraad ah ka siiyaan meelaha ay uga baahato guddidu warbixanahooda si'waafaqsan qodobka 38aad ee Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr/76/2016.

   J) Inay u yeedhi karaan dhammaan madaxda iyo masuuliyiinta kale ee ay khuseeyaan warbixinaha ay xambaarsantahay warbixin sannadeedka xisaab xidhka iyo kormeerka maaliyadeed ee loo soo gudbiyey, si ay wax uga weydiiyaan ama warbixin dheeraad ah uga siiyaan meelaha qaarkood warbixintaas si'waafaqsan qodobka 38 ee Xeerka Hantidhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr/76/2016.

   X) Si'waafaqsan qodobka 38aad, faqraddiisa 1aad ee Xeerka Hantidhawrka Guud Ee Qaranka Xeer Lr. 76/2016, inay dib u eegis ku sameeyso warbixin kasta oo Hantidhawrka Guud ee Qaranku uu Golaha Wakiillada u soo gudbiyo, dib u eegistan waxa ku jiri kara su'aal weydiinta madaxda xisaabaadka ee hay'adaha dawladda ee ay khusayso, faahfaahinta Hantidhawraha Guud iyo jawaabaha rasmiga ah ee hay'adda ay kuhsayso ama dawladda. Dib u eegistaas



GOLAHA WAKIILADA ARKIIFIYADA SOMALILAND

kaddib gudiddu waxay talo soojeedin ku salaysan dib u eegistaas u soo jeedinaysaa hay'adaha dawladda, markay muhiim u aragto, iyadoo isla markaasna ku dabo gali doonta hay'adahaas ama Hantidhawrka fulinta soojeedintooda iyagoo raacaaya xeerhoosaadka Golaha Wakiillada.

kh) Haddii ay Gudiddu ku qanacdo in warbixinta xisaab-xidhka iyo kormeerku, ama xogaha kale ee ay ku heleen waydiimihii dheeraadka ahaa ee ay waydiiyeen masuuliyiinta ay u yeedheen, ay muujinayso inuu dhacay Musuqmaasuq, ama mad-madow xisaabeed oo sababi kara musuq maaliyadeed ama wax-isdabo marin waxay Gudiddu si deg deg ah arintaasi uga diyaarindoontaa Warxbixin ay ku faahfaahinayso arintaasi iyadoo ay la-socoto soo jeedimaha ama talaabooyinka ay u aragto muhiim in la qaado iyadoo isla markaasna u gudbin doonta warbixintaasi iyo soo jeedimaheedaba Golaha Wakiiladda si waafaqsan Qodobka 38aad faqradihiisa 3aad iyo 4aad ee Xeerka Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr/76/2016, si uu uga doodo go,aan golena ugu gaadho si Waafaqsan dastuurka Qaranka iyo Xeer Hoosaadkiisa gole.

5. Guddidu waxay dalban kartaa haddii baahiyi timaaddo khabiirro aqoon dheer u leh habraaca fulinta miisaaniyadda, xisaabta, dabagalka ama baadhista maaliyadeed si ay u kaalmaysato markay gudanayso masuuliyadaheeda shaqo ee faqradaha sare ee qodobkan lagu soo xusay, sidoo kale, guddida waxa si joogto ah u gacansiin doona isla markaana farsamo ahaan caawin doona khuburada Xafiiska Miisaaniyadda iyo Dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada.

## QAYBTA SHANAAD
## XAKAMAYNTA IYO MAAREYNTA MAALIYADDA DAWLADDA

### Qodobka 26aad
### Masuuliyaddaha iyo Awoodaha Wasiirka

1. Marka laga reebo masuuliyadaha ka saaran diyaarinta iyo dejinta siyaasadaha maaliyadda, dhaqaalaha iyo sannad maaliyadeedka sida ku xusan qaybaha 2aad iyo 3aad ee xeerkan wasiirku wuxuu, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya, masuul uga yahay maamulka iyo maaraynta keydka dakhliga guud iyo guud ahaan hoggaaminta, xakamaynta iyo kormeerka dhammaan hawlaha ama arrimaha maaraynta maaliyadda iyo fulinta miisaaniyadda dawladda.
2. Wuxuu hubinayaa in la aasaaso hay'adda xisaabyahannada Somaliland iyo guddida dejinta halbeegyada xisaabadka, iyada oo qaabdhismeedka, shaqada iyo awoodaha hay'adda xisaabyahannada Somaliland iyo Golahaba uu xeer faahfaahin doono.
3. Wasiirku wuxuu soo saarayaa xeernidaamiyayaal, awaamiir ama wareegtooyin uu hadba u arko lagama marmaan iyo inay ku habboon yihiin fulinta masuuliyadahiisa ka saaran maaraynta maaliyadda iyo habsami u fulinta yoolka iyo ujeeddooyinka Golaha Wakiillada iyo badbaadada, tashiilidda iyo ka faa'iidaysiga dakhliga iyo hantida dawladda si'waafaqsan xeerkan ama xeer kale oo dhaqangal ah.
4. Xaaladaha wasiirku maqanyahay ama xaalad caafimaad uu u gudan kariwaayo waajibaadkiisa ama xilka wasiirku bannaanaado waxa xilka iyo waajibaadka gudanaaya wasiir kuxigeenka.
5. Wasiirku wuxuu si'waafaqsan Dastuuka, xeerkan iyo xeerarka kale ee ay khusayso dawladda uga xilsaaran yahay soo diyaarinta, gudbinta iyo fulinta siyaasadaha maaliyadda iyo dhaqaalaha guud.

### Qodobka 27aad
### Hawlaha iyo Masuuliyadaha Agaasimaha Guud ee Maaliyadda

1) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu Wasiirka kala talin doonaa arrimaha khuseeya dhaqaalaha, miisaaniyadda iyo maaliyadda, waxaanu wasiirka ugu xilsaaran yahay:

b. Isu'duwidda geeddisocodka diyaarinta mabaa'diida masuuliyadaha maaliyadeed (Fiscal responsibility principles) iyo geedisocodka diyaarinta miisaaniyad sannadeedka ee koobsanaya diyaarinta habdhiska buugga miisaaniyadda, diyaarinta odoros miisaaniyadeedka iyo Xeerka Miisaaniyadda.

t. Wuxuu kor u qaadi doonaa oo xaqiijin doonaa daahfurnaanta, habsamaanta iyo wax ku oolnimada, maaraynta kharashka, hantida iyo dayamaha hay'adaha dawladda iyo isku dheellitirka dakhliga iyo khashaadka dawladda.

j. Diyaarinta iyo dabagalka fulinta halbeegyada nidaamyada maaraynta xogaha maaliyadda,

x. Diyaarinta qorshe sannadeedka kharashka (annual cash flow plan) dawladda ee lagu salayn doono lacagaha qasnadda kaydka dakhliga guud ee loo sii daynaayo saraakiisha fulineed.

kh. Dabagalka isticmaalka maaliyadda iyo hawlqabadyada khuseeya ee hay'adaha dawladda.

d.) Markuu gudanaayo hawlaha ku xusan qodobkan, Agaasimaha Guud wuxuu awood u leeyahay inuu qoraal kaga dalbado sarkaal fulineed oo kasta inuu siiyo xog ama warbixin uu hadba ugu baahdo gudashada waajibaadkiisa.

r) Agaasimaha Guud wuxuu u xilsaaran yahay hubinta fulinta iyo dhaqangelinta qodobbada xeerkan iyo Xeerka Miisaaniyadda.

## Qodobka 28aad

## Aasaasida Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Qaranka

1. Xeerkan Waxa lagu aasaasay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.
2. Xisaabiyaha Guud wuxuu u gudanayaa waajibaadkiisa shaqo, si madaxbannaan isla markaasna waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

## Qodobka 29aad

## Magacaabista iyo Xil ka Qaadista Xisaabiyaha Guud Ee Qaranka iyo Ku Xigeenkiisa

1. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka waxa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, si'waafaqsan Dastuurka qodobkiisa 90aad.
2. Shuruudaha Magacaabista Xisaabiyaha Guud

   b) Inuu yahay muwaaddin Somaliland ah da'diisuna ka yarayn 30 sanno kana weynayn 60 sanno.

   t) Xubintu waa in aanay hore ugu dhicin dembi ciqaabeed hore oo xukunkiisu yahay 3 sannadood iyo waxii ka badan, sidoo kale aan lagu eedayn musuqmaasuq iyo lunsi hantiyeed.

   j) Waa in xubintu yahay qof ku sifoobay akhlaaq wanaag, daacadnimo, hufnaan iyo karti uu u leeyahay gudashada waajibaadyada shaqo.

   x) In jidh ahaan iyo maskax ahaanba u gudan karo waajibaadkiisa.

   kh) Waa in aqoontiisa/aqoonteeda waxbarasho ugu yaraan ahaato derajada heerka koowaad (Bachelor Degree) ee jaamacadda oo ah Kulliyadda Maamulka Xisaabaadka iyo Maaliyadda (Accounting & Finance) ama shahaadada caalamiga ah ee loo yaqaan (CERTIFIED PUBLIC ACCOUNTANT- CPA).

   d) Inuu leeyahay ugu yaraan 10 sanno oo ah khibrad dhinaca xisaabaadka iyo maamulka maaliyadda ah ee dawladda.

3. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka waxa xilka ka qaadaya Madaxweynaha
4. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka waxa xilka lagaga qaadi karaa marka ay caddaato arrimaha soo socda:

   b) Xilgudasho la'aan shaqo.

   t) Baal marrid xeerarka iyo nidaamka dalka.

J) Ku caddaato wax is dabamarin iyo musuq.

6. Kuxigeenka Xisaabiyaha Guud ee Qaranka waxa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda kaddib markuu helo talo soo jeedinta Agaasimaha Guud, isagoo wasiirku ka dhex xulanaaya shaqaalaha xirfadlayaasha sare ee wasaaradda ama hay'adaha kale ee maaliyadeed.

7. Shuruudaha magaacabista Kuxigeenka Xisaabiyaha Guud waxay yihiin:

   b) In Kuxigeenka Xisaabiyaha Guud yahay mid ku sifoobay shaqo wanaag, xilkas, isla markaana u gudan kara xilka si'daacad ah, hufan, jidh ahaan iyo maskax ahaana fayow.

   t) Inuu Wasaaradda ka shaqaynaayey ugu yaraan 10-kii sanno ee u dambeeyey isaga/iyada oo ka soo qabatay xil maamulka waaxaha iyo xafiisyada wasaaraddu ka kooban tahay

   j) Inuu haysto ugu yaraan shahaadada koowaad ee cilmiga xisaabadka, maaliyadda ama dhaqaalaha.

8. Kuxigeenka Xisaabiyaha Guud waxa xilka ka qaadaya wasiirka kaddib markuu helo talo soojeedinta Agaasimaha Guud ee Wasaaradda.

## Qodobka 30aad

## Awoodaha Iyo Waajibaadka Xisaabiyaha Guud ee Qaranka

1. Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxay noqon doontaa sidan soo socota:

   b) Diyaarinta iyo isku dubaridka xisaab xidhka iyo maaraynta xisaabaadka dawladda.

   t) Xisaabiyaha Guud ee Qaranku waa masuulka ugu sarreeya ee khasnadda dawladda.

   j) Guddoomidda dhammaan lacagaha dawladda ee lagu dhiteynayo ama shubayo qasanadda keydka dakhliga guud iyo ilaalinta haynta lacagtaas.

   X) Ilaalinta, kaydinta, kormeeridda iyo qiimaynta diiwaannada hantida dawladda ee ah hanti guurto ah iyo hantida ma'guurto ah intaba.

   kh) Xaqiijinta in la dejiyo lana dabbaqo nidaamyo ku habboon ilaalinta (safe keeping) dhammaan lacagaha dawladda, shatiyada (stamps), dammaanadaha (securities) iyo qoraallada qiimaha leh ee dawaladda.

   d) Haynta dhammaan shahaadadaha (mulkiyadda) lahaanshiiyaha maalgashi ee dawladda (govement certificates and of titles for investment) iyo diiwaanka maalgashiga dawladda, shatiyada, dammaanadaha iyo dhukumantiyada qiimaha leh ee dawladdu isticmaasho.

   r) Inuu saraakiisha fulinta siiyo awaamiir, tilmaamo iyo habraacyo guud kuwaas oo waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee la'xidhiidha maamulka iyo maaraynta maaliyadda isaga oo kala tashanaya wasiirka iyo Madaxweynaha.

   s) Magacabayaa xisaabiyayaasha gobollada.

   sh) Dejin doonaa halbeegyada xisaabinta iyo qaababka diyaarinta xisaab xidhka ee ay ku dhaqmayaan hay'adaha dawladda dhexe, dawladaha hoose iyo shirkadaha dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay isaga oo raacaya nidaamka caalamiga ah ee diyaarinta Xisaab xidhada ee loo soo gaabiyo (IPSAS) "International Public Sector Accounting Standards)" iyada oo haddii loo baahdana la diyaarin karo xogaha warbixinaha xisaab xidhka la xidhiidha ee ku xusan jadwalka ku lifaaqan xeerkan.

   dh) Xaqiijin doonaa in hay'adaha dawladda, dawladaha hoose, shirkadaha dawladda iyo hay'ad kasta oo dawladeed oo xeerkani ku waajibinayo gudbinta xisaab xidh sannadeed, iyo warbixin saddex bilood ahi ay u soo gudbiyeen sidii uu u dejiyay Xisaabiyaha Guud ee ku xusan xarafka sare ee "s".

   c) Joojiyo fulinta ama bixinta dalabka lacag bixin kasta (Voucher) oo baal marsan, qaldan ama aan sax ahayn, ama aan waafaqsanayn nidaamka xeerkan, xeernidaamiyayaasha, awaamiirta ama wareegtooyinka ka farcamay xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya maamulka iyo maareynta maaliyadda dawladda.

g) Dejiyaa habka kala soocidda xisaabaadka, summadaha xisaabaadka (chart of accounts) ee ay dabbaqi doona hay'adaha dawladda, dawladaha hoose, mashaariicaha, keydadka gaarka ah iyo shirkadaha dawladda.

f) Xaqiijiyaa in ay jiraan ama dejisan yihiin nidaamyo la isku hallayn karo oo ku habboon xafidaadda qoraallada iyo diiwaannada lacagta, hantida iyo dammaanadaha dawladda.

q) Ka hortagayaa lunsi, khiyaamayn ama ku tagrifal lacag ama hanti dawladeed, waxaanu samayn doonaa tallaabo kasta oo uu u arko lagama maarmaan, sida uu si kedis ah baadhitaano iyo kormeero ugu sameeyo dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladda.

k) Magacaabayaa xisaabiyayaal idman, isaga oo hay'ad kasta oo dawladeed, dawladaha hoose, shirkadaha dawladda, mashaariicaha iyo keydadka gaarka ah, ku meelaynayaa una xil saarayaa sarkaal ka tirsan Xafiiska Xisaabiyaha Guud, si uu u fuliyo waajibaadka Xisaabiyaha Guud u xil saaran yahay.

L) Hirgalin doonaa nidaamka casriga ah ee maamulka xogaha maaliyadda, kaas oo loo adeegsan doono bixinta kharashka, bixinta mushaaharooyinka, diiwaangelinta hantida dawladda, diiwaangelinta daymaha, warbixinaha maaliyadeed, qandaraasyada iyo iibka alaabta iyo adeegga.

2. Xisaabiyaha Guud isagoo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo ee xeerkani siiyey, waxa uu wasiirka warbixin ka siin doonaa cillad kasta, habacsanaan ama arrin kale oo uu u arko in ay saamayn mug leh ku yeelatay ama ku yeelan karayso gudashada masuuliyadaha wasiirka ee maareynta lacagta iyo hantida dawladda.
3. Xisaabiyaha Guud waxa uu masuul ka yahay lacagaha kabka ah ee dawladda dhexe u qabato dawladaha hoose.
4. Waa in si toos ah kabka dawladaha hoose Wasaaradda Maaliyaddu ugu wareejiso dawladaha hoose iyadoo dhammaystiran, isla markaana Xisaabiyaha Guud hubiyaa in si toos ah loogu wareejiyay dakhligaas (direct transfer)
5. Xisaabiyaha Guud wuxuu yeelanayaa Kuxigeen Xisaabiyaha Guud, kaas oo xisaabiyaha ka caawin doona socodsiinta hawlqabadka xafiiska, Kuxigeenka Xisaabiyaha Guud waxa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, si'waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 31aad

## Sarkaalka Fulineed Ee Hay'adda Dawladda

1) Sarkaalka fulineed ee hay'ad dawladeed ayaa ah sarkalka masuulka ka ah ee si shakhsi ah loogala xisaabtami doono isticmaalka iyo maaraynta lacagaha iyo hantida dawladda ee ay maamusho ama hoos timaad hay'addiisa.
2) Sarkaalka fulineed ee hay'ad kasta oo dawladeed wuxuu masuul ka yahay wax kasta oo la xidhiidha maareynta lacagta dawladda, hantida ama qaamaha/deymaha hay'adda uu masuulka ka yahay, wuxuuna yeelanayaa oo gudan doonaa awoodahan iyo masuuliyadahan soo socda:

b) In isagoo kala tashanaya, isla markaana raacaya jihaynta wasiirka wasaaraddiisa ama sarkaalka madaxa ka ah hay'addiisa uu diyaariyo qorshaha iyo ku talagalka miisaaniyad sannadeedka hay'addiisa, si loogu gudbiyo Wasiirka Maaliyadda.

t) Inuu kormeero oo xaqiijiyo in fulinta miisaaniyadda qoondaysan ee uu masuulka ka yahay loo fuliyo si'waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeernidaamiyayaasha iyo habraacyada loo soo saaro si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.

j) Inuu diyaariyo, xafido oo dhawro xisaabaha iyo diiwaannada hay'adda si'waafaqsan xeerkan, xeernidaamiyayaasha, habraacyda iyo siyaasadaha iyo awaamiirta maareynta maaliyadda, xeerarka iyo xeernidaamiyeyaasha kale ee khuseeya.

x) Inuu diyaariyo una gudbiyo wasiirka, Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawraha Guud warbixin xiliyeedyada fulinta miisaaniyadda iyo xisaabaadka hay'addiisa si'waafaqsan xeerkan iyo qaabka iyo habraacyada waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha ka farcamay xeerkan ee uu soo saaro Xisaabiyaha Guud;

Kh) In kaddib marka si waafaqsan xeerkan loogu oggolaado isticmaalka miisaaniyadda uu dalbado, qaado, hayo oo maamulo bixinta lacagaha hay'addiisa loo qoondeeyey.

d) Si hufan oo wax ku ool ah oo daahfuran u maamulo una maareeyo dhammaan

hantida dawladda ee hay'addiisu ka mas'uulka ka tahay.

1) Si hufan oo wax ku ool ah oo daahfuran u taabbagaliyo nidaamyada xakamayn gudeedyo iyo nidaamyada maaraynta khatarta ee ku habboon hay'addisa si'waafaqsan xeernidaamiyayaasha wasiirka iyo awaamiirta Xisaabiyaha Guud ama Hantidhawraha Gudaha.

2) Kormeero oo hubiyo in si sax ah loo isticmaalo hantida dawladda ee ay hayaan hay'adaha ama waaxyaha ama xafiisyada hoos yimaadda ee uu masuulka ka yahay.

Sh) Siiyo xog kasta oo ay ka dalbadaan wasiirku, Xisaabiyaha Guud ama Hantidharka Guud iyo Hantidhawrka Guduhu.

Dh) Dhaqangeliyo dhammaan talooyinka ku saabsan maaraynta maaliyadda ee wasiirka ama Hantidhawraha Guud ama Hantidhawrka Gudaha ay xukuumadda u soo jeediyaan.

c) Xaqiijiyo u hogaansanaanta iyo ku dhaqanka qodobbada xeerkan, iyo xeernidaamiye, xeerhoosaadyada, awaamiirta iyo habraacyada ka farcamay xeerkan iyo dhammaan sharciyada kale la xidhiidha maaliyadda ee khuseeya hay'addisa.

g) Fulinta waajibaadyada kale ee uu u xilsaaro ama ku waajibiyo xeerkani, xeernidaamiyayaasha ka farcama xeerkan ama xeerar kale oo dhaqangal ah, khuseeyana hay'addiisa.

## Qodobka 32aad
## Hantidhawrka Gudaha

1. Si loo xaqiijiyo nidaamka hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, waxa xeerkan lagu aasaasay, Hantidhawrka Gudaha oo ay yeelan doonaan dhammaan hay'adaha dawladda, kuwaas oo waajibaadkooda u gudan doona si'waafaqsan xeerkan.
2. Dhammaan hay'ad kasta oo dawladdeed waxa ay yeelanaysaa xafiis, qayb, unug ama sarkaal hadba sida ku habboon qaabdhismeedkeeda ama baaxaddeeda hantidhawre gudeed oo uu magacaabi doono masuulka ugu sarreeya hay'addaas dawladeed.
3. Ujeeddooyinka hantidhawrka guduhu waa;
   a) Inuu saraakiisha fulineed iyo madaxda hay'adaha dawladda ka caawiyo oo siiyo adeegyo hantidhawr gudeed iyo latalin lagama maarmaan u ah xaqiijinta in nidaamyada iyo hababka maareynta maaliyadda iyo xakamaynta khatarta.
   b) In qaabdhismeedka hay'adda u dejisan lagu dhaqmo loona hoggaansamo iyo inay nidamyadaas iyo habraacyadaasi yihiin kuwo ku habboon oo xaqiijin kara in:
      i. Khataraha si habboon loo cayimay, loo xakameeyay, loona maareeyay
      ii. Xogaha muhiimka ah ee maaliyadeed, maareyneed iyo hawgal ee muhiimka ahi yihiin xogo sax ah, dhammaystiran, la isku hallayn karo oo wakhtigeediina la helay.
      iii. Hawlgudashada shaqaaluhu waafaqsan yihiin siyaasaddaha, habraacyadda, hagayaasha xeerarka iyo xeernidaamiyayaasha dhaqangalka ah.
      iv. Kheyraadka loo isticmaalo si madhxisan, wax ku ool ah, loona ilaaliyo sida ugu habboon, si loo gaadho ujeeddooyinka loogu talaggalay.
      v. Lagu guuleysto barnaamijyada, qorshayaasha iyo ujeeddooyinka hay'adaha dawladda.
4. Hantidhawrayaasha guduhu waxay hawshooda hantidhawrista gudaha u gudanayaan si madaxbannaan, waxayna xaq u leeyihiin in ay si toos ah u helaan ama arkaan waraaqaha, diiwaannada, buugta xisaabaadka iyo warbixinnaha maaliyadeed ee hay'addahooda ee ay hadba ugu baahdaan fulinta hawsha Hantidhawrka Gudaha.
5. Hantidhawre gudeed kasta ee ku guda jira gudashada hawlaha hantidhawrka gudaha ee la kulma ama ka shakiya musuqmaasuq iyo wax isdabamarin ciddi gashay, waxa ku waajib ah in uu si dhakhso ah ugu wargeliyo madaxa hay'adda uu ka hawlgalo, isaga oo madaxa hay'addaasi uu kaddib markuu hubiyo warbixinta hantidhawre gudeedku u soo gudbiyey uu tallaabo ka qaadi doono, isaga oo warbixintaa la waadaagi doona Hantidhawraha Guud.



GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND

6. Shaqada Hantidhawraha Gudaha waxa ka mid ah:

b) Inuu si joogta ah baadhis ugu sameeyo warbixinna uga soo saaro hay'adda nidaamkeeda maamul maaliyadeed iyo nidaamka ay maamul ahaan u shaqayso hay'addu.

t) Inuu qiimeeyo ilaa xadka la raacay habraacyada maamulka maaliyadda ee ay dejinayaan xeerkan, xeernidaamiyaha ka farcamay iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

J) Inuu qiimeeyo heerka hubsiimada iyo isla xisaabtanka ee hay'addu inuu yahay mid ku habboon oo la jaanqaadaya nidaamka maaraynta maaliyadeed ee dalka.

J) Waxa uu xaqiijin doonaa jiritaanka iyo xaaladaha ay ku sugan yihiin hantida ay maamusho hay'ad dawladeed, waxaanu hubin doonaa in xaaladda ay ku sugan yihiin yahay mid xafidan oo leh ilaalin ku habboon.

a) Wuxuu hubin doonaa fulinta talabixinta Hantidhawraha Guud u soo jeediyo hay'addiisa.
b) Waxa uu dib u eegis ku samayn doonaa heshiisyada hay'addu kula jirto ganacsatada kala duduwan, waxaanu hubin doonaa inay si hufan u fulaan iyo inay ku salaysan yihiin qiimagalka lacagta (best value for money).
c) Waxa uu baadhi doonaa isticmaalka miisaaniyadda hay'adda waxaanu ka diyaarin doonaa warbixin wixii khaladaad ah ee uu ku arko.
d) Waxa uu qaban doonaa shaqooyinka kale ee uu hadba u diro masuulka hay'adda ugu sarreeyaa, isaga oo hantidhawre gudeed kastaa siin doono warbixino madaxa hay'addiisa.

## Qodobka 33aad
## Magacaabidda, Awooddaha Iyo Masuuliyadaha Hantidhawrka Gudaha

1. Hantidhawraha Gudaha ee hay'ad kasta oo dawladeed ay qaadanaysaa waa inuu ahaado shaqaale dawladeed, isla markaana waa inuu aqoon iyo waayo'aragnimo dheeraad ah oo aan ka yarayn shan sanno u leeyahay xisaabaadka, baadhista gudaha iyo maamulka maaliyadda.
2. Hannaanka loo qaadanaayo hantidhawraha gudahu wuxuu noqonayaa tartan furan oo ay habraac gaar ah ku faahfaahiso isla markaana ay kala xusho hay'adda qaadanaysaa.
3. Hantidhawrada Guduhu wuxuu fulinayaa awooddahan iyo waajibaadkan:

b) U xilsaaranayahay isu duwidda iyo korjoogteynta hawlaha hantidhawrka gudaha ee hay'adda dawladeed ee uu ka tirsan yahay.

t) Waxa uu hoggaamiyaa kana masuulyahay ka midho dhalinta iyo fulinta ujeeddooyinka guud ee Hantidhawrka Gudaha.

j) Waxa uu isku dubaridaa oo diyaariyaa, isla markaana fuliyaa qorshe sannadeedka Xafiiska Hantidhawraha Gudaha kaddib markuu ansixiyo madaxa hay'adda dawladeed ee uu ka tirsan yahay.

x) Waxa uu diyaariyaa barnaamijyo iyo qorshayaal tababar oo kor loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee hawl wadeenada hantidhawrka gudaha.

Kh) Waxa uu diyaariyaa warbixinta hantidhawrka gudaha oo saddex biloodle, lix biloodle iyo sannadle ah una gudbiyaa madax hay'adda dawladeed ee uu ka tirsan yahay.

d) Waxa uu diyaariyaa, kana masuulyahay fulintooda iyo ku dhaqankoodaba, hagayaasha iyo habraacyada hantidhawrka gudaha oo ku salaysan halbeegyada hagaha caalamiga ah ee adeegyada xirfadeed ee hantidhawrayaasha gudaha, isla markaana waafaqsan Dastuurka Somaliland, xeerkan, xeernidaamiyayaasha iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

r) Fulinta hawlaha kale ee uu u xilsaaro xeernidaamiyaha hantidhawrka gudaha, xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

### Qodobka 34aad
### Hantidhawraha Guud

1. Hantidhawraha Guud wuxuu u xilsaaran yahay in si'waafqsan Xeerka Hantidhawrka Qaranka baadhitano iyo hantidhawris ugu sameeyo xisaabaadka, hantida iyo waliba hawlgudashada dhammman wasaaradaha, wakaaladaha, waaxyaha iyo hay'ad ama qof kasta oo kale oo magaca dawladda ku qaada ama ku ururiya lacag dawladeed ama hela miisaaniyadda dawladda.
2. Hantidhawraha Guud waxa uu samayn doonaa baadhis maaliyadeed, mid waxqabad iyo baadhista u hoggaansanaanta sharciga.
3. In uu warbixnno hantidhawr u diyaariyo uguna gudbiyo Golaha Wakillada si'waafaqsan Xeerka Hantidhawrka Qaranka iyo Dastuurka.
4. In uu guto waajibaadyada, awoodaha iyo masuuliyadaha kale ee uu saaro ama siiyo Xeerka Hantidhawrka Qaranku, xeerkan iyo xeerarka kale e dhaqangalka ah.

## QAYBTA LIXAAD
## MAARAYNTA LACAGAHA IYO HANTIDA DAWLADDA

### Qodobka 35aad
### Aasaaska Kaydka Dakhliga Guud ee Dawladda

1) Si loo xaqiijiyo habsamida iyo hufnaanta maaraynta miisaaniyadda iyo xisaabaadka Qaranka, waxa iyadoo laga duulayo qodobka 54(2) ee Dastuurka halkan loogu aasaasey kaydka dakhliga guud ee dawladda, kaas oo ah qasnad xisaabeed midaysan oo qudha oo ka furnaan doonta Baanka Dhexe ee Somaliland, yeelanna karta xisaab hoosaadyo u gaar ah hay'adaha iyo macaamilka dawladda ee kala duwan.

2) Dhammaan dakhliyada dawladda waxa magaca wasaradda loogu dhiteyn ama dhigi doona Kaydka dakhliga guud ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.

3) Ujeeddada qodobkan, dakhliyada dawladda waxa loola jeedaa, dhammaan lacagaha ay kasbato, hesho ama usoo xarooda dawladda ee ay ka mid yihiin lacagaha:

b. Dakhliga ka soo xarooda cashuuraha, ujuurooyinka (fee), takaaliifta (charges), ganaaxyada(fines) ay qaaddo dawladda dhexe,

t. Dakhliga ka soo xarooda ganaaxyada ciqaabta (penalties), iibka xadhig ciqaabeedka iyo hantida lala wareego.

j. macaashka iyo faa'iidada saamiyada shirkadaha ganacsi ama maalgashiyada ganacsi ee dawladda.

x. Dakhliga dawladda dhexe ka hesho kirada, takaaliifta iyo lacagaha ku waajiba isticmaalka khayraadka dabiiciga ee dawladda dhexe.

kh. Lacagaha uga soo xarooda kirada iyo iibka ama xaraashka hantida dawladda dhexe.

d. dhammaan deeqaha iyo daymaha dibadda iyo gudaha ee ay dawladu hesho.

r. Dakhliga laga helo ilaha kale ee uu hadba qeexo Xeerka Miisaaniyaddu.

4) Ujeeddada qodobkan, lacagahan soo socdaa kuma jirayaan dakhliga kaydka dakhliga guud

   b. dakhliga ama faa'iidada iyo raasamaalka ku magacaaban Khasnad kayd gaar ah oo loo aasaasey si waafaqsan qodobka 37aad ee xeerkan.

   t. Lacagaha uu xeer oggolaaday in ay hay'adda ururisey ay haysato una siticmaasho bixinta kharashaadka fulinta hawlaheeda.

   j. Lacagta sarkaal maxkamadeed uu hayo ee loogu dhiibay ujeedo ku saabsan fulinta amar makamadeed, ama lacagaha sarkaal ama hay'ad dawladeed amaamno ama dammaanad ahaan ugu hayso cid kale; iyo

   x. Lacagaha dawladaha hoose uga soo xarooda iibka iyo kiraynta hantida gaarka u ah dakhliyada cashuuraha, khidmadaha, takaaliifta iyo ganaaxyada ay dawladaha hoose gaarka u leeyihiin ee uu xeer dhaqangal ahi dhigayo.

5) lacagaha kaydka dakhliga guud waxa loo isticmaali karaa oo kaliya:

b. fulinta hawlaha iyo waajibaadyada dawladda si'waafaqsan xeerkan iyo Xeerka Miisaaniyadda iyo xeerka kaabis miisaaniyadeed oo dhaqangal ah.

r. Aasaasidda Kayd Gaar ah si waafaqsan Qodobka 35aad ee Xeerkan;

## Qodobka 36[aad]

## Kaydka Dakhliga Dawladaha Hoose

1) Dawladaha hoose oo kastaa waxay yeelan karaan kaydad dakhli ugaar ah kaas oo noqon doona qasnad xisaabeed uga furnaan doona Bangiga Dhexe.

2) Kaydka dakhliga dawladda hoose waxa lagu shubi doonaa dhammaan lacagaha dawladda hoose ee ay ka mid ka yihiin:

b. Dakhliga uga soo xarooda cashuuraha, ujuurooyinka, ganaaxyada iyo takaaliifta kale ee dawladaha hoose ee uu dhigayo Xeerka Maamulka Gobollada iyo Dawladaha Hoose.

t. Dakhliga iibka iyo kiraynta hantida dawladda hoose.

j. Lacagaha qoondeyn miisaniyadeeyada taageerada (subsidies), wadaaga dakhiga kastamada iyo daadajinta adeegyada dawladda ee loogu qoondeeyo miisaanayadda dawladda dhexe

x. Lacagaha deeqaha ama amaahda ee lagu qaado ama lagu helo magaca dawladda hoose

kh. Dakhliga kale ee dawladda hoose ka hesho ilo kale si'waafaqsan xeerkan.

3) Kaydka dakhliga dawladda hoose waxa loo maamuli doonaa si'waafaqsan Xeerka Maamulka Gobollada iyo dawladaha hoose, xeerkan iyo xeernidaamiyayaasha iyo habraacyada ka faracama xeerkan.

4) Haddii qodobbada Xeerka Maamulka Gobollada iyo dawladaha hoose khilaafo ama aanu la jaanqaadi karaynin qodobbada xeerkan ama xeernidaamiyayaasha ka farcama, qodobbada xeerkan ama xeernidaamiyayaasha ka farcama ayaa lagu dhaqmi doonaa.

5) Kaydka dakhliga dawladda hoose iyo kaydadka gaarka ah ee lagu aasaaso xeer waxa ay ka mid ahaan doonaan kuna shaqayn doonaan nidaamka qasnadda midaysan ee dawladda (Treasury Single Account).

## Qodobka 37[aad]

## Aassaasidda Kaydad Gaar ah

Kayd kasta oo gaar ah oo la abuurayo waxa waajib ah inta aan la abuurin in wasiirku diyaariyo xeer kii lagu maamuli lahaa kayd kaas una soo gudbiyo Golaha Wakiillada, waxa reebban abuurista kayd kasta oo aan lahayn Xeer Golaha Wakiilladu ansixiyey.

## Qodobka 38[aad]

## Oggolaanshaha Lacagaha Laga Saarayo Kaydka Dakhliga Guud

1. Wax lacag ah lagama saari karo Kaydka Dakhliga Guud iyada oo aan marka hore la helin oggolaansho awood kharash (waaran) uu si waafaqsan xeerkan wasiirku u saxeexay, hanti dhawraha Guudna u oggolaaday kuna socodsiiyay Xisaabiyaha Guud, waxa reebban kharash kal kasta oo mudaysan (periodic warant) oo miisaaniyadeed oo aanu Hantidhawraha Guud oggolaan in la galo.
2. Wasiirku ma bixin karo oggolaansho awood kharasheed aanay ujeeddadiisu ahayn:

b. Bixinta raasamaalka aasaasidda kayd gaar ah si'wafaqsan qodobka 37aad ee xeerkan.

t. Bixinta kharashaadka hay'adaha dawladda ugu jira qoondayn miisaaniyadeedka Xeerka Miisaniyadda ama xeerka kab miisaaniyadeed ee kal sannad maaliyadeedka lagu jiro.

j. Dib u bixinta ama celinta lacag si khalad ah ku soo gashay keyda dakhliga guud.

x. Bixinta miisaaniyadda Golaha Wakiillada sida ku xusan qodobka 13aad ee xeerkan ama lacagaha kale ee hay'ad dawladeed xeer u waajibiyay in toos looga saaro qasnadda.

kh. Bixinta maalgashi shirkad ay dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.

vi. Wasiirku waxa uu hakin karaa, dib ula noqon karaa, xaddidi karaa ama ku soo rogi karaa shuruudo awood kharash bixin kasta ama amar kale oo uu isagu soo saaray, haddii uu wasiirku ku qanco in tallaabadaas loogu baahan yahay sabab la xidhiidha arrin maaliyadeed oo degdeg ah ama ay ku jirto danta guud.

## Qodobka 39aad

## Maareynta Xisaab Bangiga (Bank Account Management)

1) Wasiirku wuxuu hubinayaa in la hawlgeliyo qasnadda midaysan ee guud (Consolidated Treasury Single Account) oo ay ku jiraan dhammaan xisaabaadka bangiyadda uga furan hay'adaha dawladda.

2) Wasiirku wuxuu soo saarayaa xeernidaamiye qaabdhismeedka iyo hawlgalada qasnadda midaysan ee dawladdu ku shaqayn doonto.

3) Wasiirku qasanadda wuxuu dajin doonaa nidaam miisaaniyadlayaashu u fulin doonaan hawlahooda khuseeya xisaab bangiyeedyada iyo maaraynta lacagaha caddaanka (their banking and cash management activities);

4) Haddii aan oggolaanshiyo qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud, ma bannaana in miisaaniyadle ama hay'ad dawladeed oo kale ay furato xisaab bangi (bank account) dalka gudihiisa ama dibaddiisa kaas oo la dhigo ama lagala baxo lacag dawladeed.

5) Miisaaniyadlahu ah waxa uu u maarayn doonaa xisaab bangiyeedkiisa si'waafqsan qaabka iyo shuruudaha uu Xisaabiyaha Guud u dejiyo.

6) Baanka dawladda Somaliland ayaa noqonaya kayd ha'yadaha laga dhigayo lagana bixinayo lacagaha miisaaniyadda hawfulinta iyo mashaariicda miisaaniyadlayaasha.

7) Xisaabiyaha Guud waxa uu miisaaniyadle u ogolaan karaa inuu xisaab bangi (bank account) ka furto bangi ama hay'ad maaliyadeed gaar loo leeyahay.

8) Xisaabiyaha Guud waxa uu maamuli doonaa (regulate) dhaqdhaqaaqyada xisaab bingiyeedka miisaniyadlaha, waxa aanu awood u leeyahay inuu hakiyo ama xidho xisaab bangiyeedkaas, haddii uu u arko inay lagama maarmaan u tahay danta guud, kaddib marka uu kala tashado wasiirka.

9) Marka la xidho xisaab bangi, sarkaalka fulineed ee ay khusaysaa waa inuu muddo 30 casho gudahood ah Xisaabiyaha Guud kula socodsiiyo xidhitaanka xisaab bangiyeedkaas.

10) Baanka Dhexe ee Somaliland ama bangiga ama hay'adda maaliyadeed ee gaar loo leeyahay ee haya xisaab bangi uga furan hay'ad dawladeed waxa ku waajib ah inuu muddo afar iyo toban cisho gudahood ah ku siiyo Xisaabiyaha Guud ama Hantidhawraha Guud, hadba kii ka soo codsada, xogaha khuseeya xisaab bangiyeedkaas laga soo codsaday.

## Qodobka 40aad

## Maarayta Lacagta Naqadka Ah

1. Wasiirku waxa uu dejin doonaa nidaamka dawladdu ku maamulayso macaamilkeeda lacageed ee naqadka ah.
2. Wasiirku wuxuu aasaasi donaa guddida maaraynta lacagta naqadka ah (Kaashka) (Cash management Committee);
3. Guddida maaraynta lacagtu (Kaashku) waxay ka koobnaanaysaa:

    b. Xisaabiyaha Guud oo noqon doona Guddoomiyaha guddida.
    t. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda oo noqonaya Guddoomiye kuxigeenka guddida.
    j. Agaasimaha Guud ee Baanka Dhexe iyo xubin kale oo ka tirsan saraakiisha Baanka Dhexe.
    x. Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda.
    kh. Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha ee Wasaaradda Maaliyadda.
    d. Sarkaal ka tirsan Xafiiska Xisaabiyaha Qaranka.

4. Xarunta fadhi iyo shaqo ee guddidu waxa ay noqonaysaa Xarunta Dhexe ee Wasaaradda Maaliyadda, iyada oo Agaasimaha Guud uu diyaarin doono goobta lagu shaqaynaayo.

5. Wasiirku markuu guddida dhisayo, waxa uu qeexi doona hawlaha iyo waajibaadyada shaqo ee guddida.

## Qodobka 41aad
## Maalgashiga Lacagaha Kaydka Guud ee Dakhliga

1. Lacagta ku jirta Keydka Dakhliga Guud ee aan loogu baahnayn si degdeg ah, si loogu baxsho kharashka dawladda, waxa lagu maalgelin karaa:-
   b) Baanka isaga oo codsanaya, wasiirkuna u ansixiyo.
   t) Shirkad ay dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay oo dalka guhiisa ama dibaddiisa ah, kaddib marka wasiirku oggolaado.
   j) Maalgelin uu oggolaaday sharci si' loogu maalgaliyo kaydadka ammaanahayn (maal cahdi) (trust) oo uu wasiirkuna oggolaado.
2. Iyada oo ay shardi tahay shuruudaha maalgashi ee wasiirku jideeyo maalgelinta qodobkani uu hoos imaanayo, wasiirku waa inuu, awood kharash oo uu saxeexay u gudbiyaa Xisaabiyaha Guud, waxaanu sii dayn karaa lacagta maalgelinta oo laga saaro kaydka dakhliga guud.
3. Maalgelinta laga saarayo kaydka dakhliga guud ee sare ku xusan waa inuu ansixiyo Golaha Wasiirradu, kaddib marka uu helo tallabixinta Wasiirka Maaliyadda.

## Qodobka 42aad
## Maaraynta Hantida Dawladda

1. Hanti kasta (hanti ma'guurto ama guurto ah, hanti la taaban karo ama mid aan la taaban Karin) oo aanu qof u lahayn sifo sharci ah waxa ay noqonaysaa hanti dawladeed.
2. Hantida soo socota waxa iska leh Qaranka, haddii aanay ahayn hanti dadweyne ama shakhsiyaad gaar ahaaneed.
   b. Kanaalada iyo biyamereenka aan dabiiciga ahayn.
   t. Waddooyinka, biriijyada, dariiqyada, jidadka, garoomada dayuuradaha, xerooyinka xoolaha lagu hayo (seerayaasha), qabuuraha iyo suuqyada.
   j. Farshaxanka taarikhiga ah iyo wixii la xidhiidha asaarta qadiimiga ah.
   x. Goobaha iyo dhismayaasha si'joogta ah loogu tala galay in dadweynuhu ku cibaadaysto.
   Kh. Khayraadka macdaneed.
   d. Xeryaha iyo bakhaarrada ciidamada.
   r. Dhismayaasha kale ee Qaranka.
   s. Daamamka, Ceelasha, balliyadda iyo biyaqabatineedyada kale.
   sh. Iyo guud ahaan hantida kale ee guurtada ama ma'guurtada ah ee dawladdu ku hantiday si'waafaqsan xeerarka dalka.
3. Qandaraaska, ilaalinta, dhaqan ka baxa iyo maamulka hantida raagta ee dawladda waxa loo raacayaaa Xeerka Qandaraasyada Qaranka X/LR 82/2018.
4. Diwaangelinta hantida raagta ee ma'guurtada ah, waxa ka masuul ah Wasaaradda Hawlaha Guud, waxaanay la wadaagayaan diwaanka hantida ma'guurtadda ah Xafiiska Xisaabiyaha Guud oo haynaya diwaanka dhexe ee hantida raagta kuna soo darayaa warbixinaha maaliyadeed.
5. Xisaabiyaha Guud ayaa ka masuul ah diwaangalinta hantida guurtada ah.
6. Hantida aan la taaban karin (intangible asset) waxa diwaangalintooda ka masuul ah Wasaaradda Tignoolajiga, iyada oo diwaankaas la wadaagi doontaa Xisaabiyaha Guud.

S

# QAYBTA TODDOBAAD
# FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA

## Qodobka 43aad
## Masuuliyadaha Dhaqangalinta Miisaaniyadda Dawladda

1) Wasiirka ayaa masuul ka ah guud ahaan maaraynta iyo fulinta miisaaniyadda loo ansaxiyo si waafaqsan xeerkan. Si uu u guto masuuliyaddiisaasi, wasiirku wuxuu karaa inuu xeernidaamiye waafaqsan xeerkan kana hor imanaynin xeerarka kale ee dhaqangalka ah saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda ugu wakiisho ama xilsaaro fulinta qaybo ama dhammaan fulinta masuuiyadahiisa guud ee maaraynta iyo dhaqangelinta miisaaniyadda. Hasayeeshee, wakiilashadaasi kama reebayso wasiirka xilka ka saaran gudashada masuuliyadahiisa maaryanta iyo dhaqangalinta miisaaniyadda.
2) Saraakiisha fulineed ee hay'adaha dawaladdu waxay si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah saraakiisha ama hawlwadeenada hay'adaha ay ka masuulka yihiin ugu wakiilan karaan gudashada masuuliyadahooda maaraynta iyo fulinta qoondaymaha miisaaniyadda loo qoondeeyay hayadaha ay ka masuulka yihiin. Hasayeeshee, wakiilashadaasi kama dul qaadayso sarkaalka fulinta ama sarkaalka idman masuuliyadda ka saaran fulinta iyo isticmaalka miisaaniyadda uu masuulka ka yahay.

## Qodobka 44aad
## Qodobbada Saldhigga U ah Dhaqangelinta Miisaaniyadda

1) Dhaqangelinta miisaaniyadda waxa loo raacayaa oo hagi doona qodobada qaybtan 7aad ee xeerkan iyo xeernidaamiyayaasha ka farcama xeerkan.
2) Dhammaan lacagaha laga bixinayo miisaaniyadda Qaranka waa in si toos ah looga bixiyo keydka dakhliga guud.
3) Dhammaan xogaha khuseeya dhaqdhaqaaqyada qabashada dakhliga iyo bixinta kharashka waa in la mariyo laguna diiwaangaliyo nidaam xisaabeedka maaraynta xogaha maaliyadda Somaliland oo ay isna waafqaan warbxinta bangi xisaabeedka (bank statement) ee Bangiga Dhexe.
4) waxa sarkaal kasta oo fulineed iyo sarkaal dawladeed kasta oo ay khusayso ka reebban:
   b. bixinta lacag ka badan qoondaynta miisaaniyadda qoondaysan ee sannad miisaaniydeedka ay khuseyso.
   t. gelidda heshiis ama balanqaad bixin kharash miisaaniyadeed aan loo hayn ama loo qoondayn miisaanid ku filan.

## Qodobka 45aad
## Wareegtada Ogeysiinta Dhaqangelinta Miisaaniyadda iyo Qorshaha Fulinta Miisaaniyadda

1. Wasiirku wuxuu, isla marka uu helo Xeerka Miisaaniyadda Qaranka ee uu saxeexay Madaxweynuhu, soo saari doonaa wareegto qoraal ah oo uu dhammaan wasiirrada iyo madaxda hay'adaha dawladda kula socodsiinayo dhaqangelinta miisaaniyadda, kuna wargeliyo in muddo 30 casho gudahood ay u soo gudbiyaan qorshe sannadeedkooda fulinta miisaaniyadaha hay'adahooda iyo kuwa hoos yimaadda.
2. Wareegtada wasiirka ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waa inay ku lifaaqan yihiin qoraallo tibaaxaya arrimahan ay ka mid yihiin:
   b. Qorshayaasha iyo lacagaha qoondayn miisaaniyadeedka Golaha Wakiilladu u ansixiyey ee wasaarad ama hay'ad kasta.
   t. Qoondayn miisaaniyadeedka ugu jira miisaaniyadda dawladaha hoose:
   j. Xeernidaamiyayaasha, nidaamyada iyo habraacyada dhaqangalka ah ee loo raacayo fulinta Miisaaniyadda.
   x. Xadka lacagaha horumariska ah ee la oggolyahay in laga bixiyo miisaaniyadda
   kh. Wasiirka wasaarad kasta iyo madaxa hay'ad dawladeed ee kasta ee lagu socodsiiyo wareegtada wasiirka ee ku xusan qodobkan, wuxuu si'waafqsan muddada ku

. cayima faqradda 2aad ee qodobkan iyo qaabka uu wasiirku u dejiyo u diyaarin doonaa uguna gudbin doonaa wasiirka qorshaha fulinta miisaaniyadaha hay'addiisa iyo kuwa hoos yimaadda oo u habaysan bille iyo saddex biloodle, kuna salaysan qoondaymaha hay'addiisa loogu qoondeeyey Xeerka Miisaaniyadda.

d. Kaddib marka uu helo, qorshaha fulinta miisaniyadda ee loogu soo gudbiyay si waafaqsan qodobkan ee uu hubiyo in uu waafaqsan yahay ansaxintii iyo ujeeddadii Golaha Wakiillada. Wasiirku wuxuu soo saari doonaa qorshe sannadeedka guud ee fulinta miisaaniyadda, kaas oo uu u gudbin doono Xisaabiyaha Guud iyo madaxda hay'adaha Dawladda.

3. Wasiirku wuxu awood u leeyahay in uu dib-u-eegis ku sameeyo qorshaha fulinta miisaaniyadda ee ku xusan Qodobka sare.
4. Qorshe sannadeedka fulinta miisaaniyadda ee uu wasiirku u soo saaro si waafaqsan faqradda sare, wuxuu sal u noqonayaa:
   b. Oggolaanshaha Xisaabiyaha Guud uu ku oggolaanayo in xisaabta kaydka dakhliga guud laga bixiyo lacagaha qoondayn kharash miisaaniyadeed.
   u. Gelidda kharashyada ay gali karaan saraakiisha fulinta ee hay'aduhu.

## Qodobka 46aad

## Codsi Iyo Oggolaansha Bixinta Kharashka ee Xisaabiyaha Guud

1) Madaxa wasaarad, waax ama wakaallad kasta oo qayb ka ah miisaaniyadda sannad miisaaniyadeed, wuxuu isagoo ka duulaya qorshaha fulinta miisaaniyadda ee wasaaraddiisa ama hay'adda uu madaxa ka yahay, sarkaalka fulineed ee hay'addiisa siin doona awoodsiin kharash isagoo soo saari doona awoodsiin kharash saddex billood leh oo uu ku saxeexan yahay, taas oo loo gudbin doono wasiirka si uu u soo saaro oggolaansho awood kharash si'waafqasan qodobka 38aad ee xeerkan.

2) Kaddib marka uu helo oggolaansho awood kharash oo wasiirku u soo saaray si'waafqsan faqradda 2aad ee qodobkan, Xisaabiyaha Guud wuxuu si'waafaqsan qodobbada qaybtan 7aad iyo xeernidaamiyayaasha ka farcama xeerkan, u siin doonaa sarkaalka fulineed oggolaansho bixin kharash uu ku oggolaanayo in qaddarka lacagta ku cad awood kharashka wasiirku oggolaaday laga saarayo xisaabta kaydka dakhliga guud

## Qodobka 47aad

## Masuuliyadda Fulinta Miisaaniyadda ee Sarkaalka Fulineed

1) Sarkaalka fulined ee miisaaniyadle kasta wuxuu, si waafqasan, qorshe sannadeedka fulinta miisaaniyad kharasheedka ku xusan qodobaka 46aad ee xeerkan, u fulin doonaa oo maarayn doonaa miisaaniyadda hay'addiisa;
2) Sarkaalka fulineed ma gali karo kharash, haddii aanu haysan lacag caddaan ah oo qayb ka ah miisaaniyaddiisa ama aanay jirin qoondayn kharash miisaaniyadeed ku filan oo kharashkaas loo qoondeeyay kuna cad miisaaniyad sannadeedka dhaqangalka ah.
3) Lama bixin karo kharash haddii aan si dhammaystiran aan loogu diiwaangelin nidaamka maaraynta xogaha maaliyadda.
4) Sarkaalka fulineed waxa uu si waafaqsan qaab dejinta (format) uu Xisaabiyaha Guud u dejiyo, saddexdii bilood hal mar Xisaabiyaha Guud u gudbin doonaa warbixinta waxqabadka hawlaha iyo fulinta miisaaniyadda ee hay'adda uu masuulka ka yahay.

## Qodobka 48aad

## Gelidda Heshiisyada Muddada Dheer

1) Haddii uuna si'waafaqsan faqradaha 2aad iyo 3aad ee qodobkan aanay ku jirin miisaaniyad sannadeedka kharash u dhigma ama ka yar hay'ada sarkaalka fulineed ma gali karo heshiis, qandaraas ama hawl kale oo dawladda saaraysa gudashada waajib maaliyadeed qaadanaya muddo ka badan hal sanno ama sababaya in dawladdu gasho dayn lama filaan ah (Contingent liability).
2) Dhammaan heshiisyadda muddada dheer soconayaa waa inay miisaaniyad ku filan oo Golaha Wakiilladu u ansixiyay ugu jirtaa miisaaniyad sannadeedka.

3) Oggolaansha Golaha Wakiillada waxa keliya oo la siin karaa heshiisyada ama mashaariicda qaybta ka ah ama waafaqsan fulinta ujeeddooyinka siyaasadda miisaaniyadda ee ku jirta habdhiska miisaaniyadda.
4) Wasiirku wuxuu sannad miisaaniyadeed kasta warbin ka siinayaa Golaha Wakiillada fulinta maaliyadeed ee heshiisyada barnaamijyada muddada dheer.

## Qodobka 49aad
## Hubinta Gelidda Balanqaadyada

Wasiirku waxa uu dejin doonaa xeernidaamiye qeexaya nidaamka loo raacayo hubinta iyo habka diiwaangelinta xakamaynta balanqaadyada lacagaha lagu dalacayo qoondaymaha miisaaniyadda qoondaysan.

## Qodobka 50aad
## Bixinta Kharashka Hawlaha, Agabka iyo Adeegyada

Waxa reebban in wax kharash laga bixiyo qasnadda kaydka guud, haddii aan la soo gudbin qaansheeg iyo caddeymaha kale ee looga baahan yahay si'wafaqsan xeernidaamiyayaasha iyo nidaamka xisaabaadka, sarkaalka fulineedna hubinin, in:

b. Haddii kharashku yahay kharash loo balanqaaday/yaboohay hawl la fulinayo, agab la keenayo ama adeeg la bixinayo,
   I. In hawshii la fuliyay ama agabkii lala wareegey ama adeegii la heley ama la qabtay, iyada oo la hayo caddaymo ku filan.
   II. In kharashka la soo dallacay waafaqsan yahay qiimaha lagu heshiisyay ee ku cad heshiiska ama ballanqaadka.
   III. In bixinta lacagtu waafaqsan tahay shuruudaha heshiiska ama balanqaadka iyo lacagaha horumarinta (advances) waafaqsan yihiin xaddaynta horumarinta ee uu dhigayo xeernidaamiyayaal ka farcama xeerkan, haddii lacagta la bixiyo ka hor fulinta hawsha, keenidda agabka ama bixinta adeegga,

t. Haddii kharashku yahay kharash kale, in cidda la siinayaa tahay ciddii xaqa u lahayd.

# QAYBTA SIDDEEDAAD
# AMAAHDA, DAMMAANADAHA DAYMAHA IYO DEEQAHA DAWLADDA

## Qodobka 51aad
## Awooda Qaadashada Amaahda Iyo Bixinta Damaanadda Deymaha

1. Si waafaqsan xeerkan, wasiirka oo kaliya ayaa awood u leh in uu magaca dawladda lacag ku amaahdo gudaha ama dibadda dalka, dayn ku bixiyo ama dayn ku damiinto. Waxana reebban in iyadoon la haysan oggolaanshaha wasiirka ay, hay'ad dawladeed ama gole deegaan dawlad hoose ama wakaalad ama cid kale magaca dawladda amaah ku qaadato ama dayn ku bixiso ama dayn ku dammiinato ama ku galo heshiis ama hawl kale oo ay si toos ah ama dadban uga dhalan karto masuuliyad maaliyadeed loo raaco dawladda.
2. Iyadoon waxba loo dhimayn faqradda 1aad ee qodobkan, dawladaha hoose waxay qaadan karaan deyn, balse waxaa mar kasta waajib ah in deyntaasi uu oggalaado Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu.

3. Dawladda Hoose ee codsanaysa in loo ogolaado deyn in ay qaadato, waxaa ku waajib ah in ay Wasiirka Maaliyaddu usoo gudbiso faahfaahinta deyntaasi iyo danta ugu jirta degmadooda iyo qarankaba.

4. Wasiirka Maaliyaddu haddii uu ku qanco soo jeedinta Golaha Deegaanka wuu ogolaan karaa dayntaasi haddii ay degmadda iyo Qarankaba sidaas dani ugu jirto, xaddiga dayntuna waa inuu yahay mid macquul ah oo aan ku keenayn culays dhaqaale dawladda.

5. Faqradaha 4aad illaa 6aad ee qodobkan waxa lagu nasakhay qodobka 94aad, xarfihiisa B iyo J ee Xeerka Ismaamulka Gobolladda & Degmooyinka Xeer Lr. 23/2019.

6. Sidoo kale qodobka 94aad, xarafkiisa (D) ee Xeer Lr 23/2019 waxaa loo beddalay siday faqradan hoose ee 9aad ee qodobkani ay sheegayso. balse dhammaan xarfaha kale ee aan ahayn A, C iyo D ee qodobka 94aad ee Xeer Lr 23/2019 sidoodii hore ayey ahaanayaan, waana lagu dhaqmayaa.

7. Haddii ay timaaddo duruufo degdeg ah, sida aafooyinka dabiiciga ah ama arrimo nabadgelyo oo keensanaya culays dhaqaale ama u baahan dhaqaale deddeg ah oo aan isla markaasna ku jirin miisaaniyadda sannadkaas ee golaha deegaankaas, guddida fulinta ee degmadu waxay awood u leedahay in ay dayn qaadato ay ku daboosho baahidaas, balse waxaa waajib ah mar kasta ka hor inta' aan go'aanka daynta laga ansixin golaha degmadaas, waa inay oggolaansho ka helyaan Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan faqradaha sare ee 5aad iyo 6aad ee qodobkan.

8. Waxa waajib ah in dhammaan daymaha lagu sheegay qodobkan ugu dambaynta uu Wasiirka Maaliyaddu u gudbiyo Golaha Wakiillada si uu u ansixiyo si waafaqsan qodobka 55aad faqraddiisa 3aad ee Dastuurka iyo qodobka 53aad faqraddiisa 1aad ee xeerakan.

9. Lama oggola in ay dawladaha hoose galaan dayn aan loo marin qaadashadeeda si waafaqsan faqradaha sare ee qododkan.

## Qodobka 52<sup>2ad</sup>

## Lacag Amaahasho

1. Amaahda iyo daymaha loo qaaday ujeeddooyinka qodobka 51aad, faqraddiisa 1aad, xadka iyo shuruudaha daymaha kale ee loo qaaday si'waafaqsan xeerkan laguma dhaqmi doono ilaa uu ansixiyo Golaha Wakiilladu.

2. Wasiirku wuxuu sannad maaliyadeed kasta diyaarin doona nidaamka lagu maamulayo daymaha, waxaanu soo saari doonaa macluumaadka iyo shuruudaha wax amaah ah lagu gali karo iyo sidoo kale daymaha ay dawladdu balanqaadayso wakhti illaa wakhti iyo sidoo kale qaabcelintaa daymahaas ama amaahahaas loo celinaayo.

## Qodobka 53aad

## Qaabka Qaadahsda Amaahda

1. Qaabka uu wasiirku u qaadan karo amaah lacageedyada ku xusan qodobka 52aad ee xeerkani waxay noqon karaan:
   b. Qaab ku salaysan bixinta sendooyinka khasanadda dawladda (bills), damaamanad lacageed (bonds) ama saamiyo.
   t. Qaab kasta oo kale ee uu wasiirku u arko in habboon yihiin, sida casaynta xisaab bangiyeedka (fluctuating overdraft) ee waafaqsan xeerarka Khuseeya.
2. Amaahda loo qaadanayo si'waafaqsan xarafka (b) ee faqradda (1aad) ee qodobkan, waa in la waafajiyo shuruudaha uu soo saaro wasiirku.

## Qodobka 54aad

## Dib U Bixinta, Isku Beddelka iyo Iskudarka Amaahda

1. Wasiirku waxa uu kari karaa in:-
   b) Uu dib u bixiyo lacagta amaahda ah ka hor xilligii dib u bixinteeda.
   t) Uu amaah ku beddelo amaah kale.
   j) Uu isku daro laba ama dhawr amaahood, kuna daro amaah hore u sii jirtey ama ka dhigo amaah cusub.
2. Si uu u fuliyo ujeeddooyinka faqradda 1aad ee qodobkan, wasiirku waa inuu xaqiijiyo inuu haysto ama helo oggolaanshaha deeq bixiyaha ay khusayso, marka sidaasi ay lagama maarmaan tahay.

## Qodobka 55aad

## Kharashka Ku Baxa Qaadashada Amaahda

Dhammaan kharashka iyo lacagaha kale ee ku baxda qaadashada iyo maaraynta amaah lacageedyada loo qaato si'waafaqsan xeerkan, waxa lagu dallici ama laga bixin doonaa keydka dakhliga guud ama raasamaalka lacagta la amaahday.

## Qodobka 56aad
## Awoodda Dammaanad Qaadka Daynta

1) Haddii uu ku qanco in ay tahay dan guud ama dan qaran wasiirku waxa uu kari karaa inuu si'waafaqsan hannaanka iyo shuruudda habboon oo uu u dejiyay kana ansaxiyay Golaha Wakiillada wuxuu magaca dawladda ku dhigo ama bixiyo dammaanad lagu dammaanad qaadayo dib u bixinta raasamaalka, faa'iido shareecada waafaqsan iyo khidmadaha daynta dalka gudihiisa ama dibaddiisa ee ay amaahanayaan: -
    b) Golayaasha dawladaha hoose.
    t) Wakaalad dawladeed ama shirkad dawladeed.
    j) Hay'ad kasta oo dawladeed.
2) Ka hor inta uuna dhigin ama bixin dammaanadda ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, wasiirku waxa uu hubin doonaa in ujeeddada loo qaadanayo amaahdu tahay dan guud ama dan qaran isla markaana waafaqsan tahay ku salaysan tahay ama la jaanqaadayso siyaasadda dawladda iyo qorshaha horumarinta Qaranka.

## Qodobka 57aad
## Bixinta Kharashka ku Baxa Dammaanadaha Daynta

1. Kharashaadka ay dawladdu ku gasho bixinta dammaandaha ku xusan qodobka 53aad ee xeerkan waxa lagu yeelanayaa oo si'waafaqsan qaabka uu amro wasiirkuna ugu celin doonaa dawladda, gollaha deegaanka, wakaaladda ama shirkadda dawldeed hay'adda kale ee ka faa'iidaysatay ama heshay lacagta daynka la dammaanad qaaday.
2. Lacagta loogu celinaayo dawladdu sida ku xusan faqradda 1aad ee qodobkani waxay ka koobnaan doontaa:
    b) Dhammaan lacagaha ay dawladdu ku bixisay bixinta dammaanadda.
    t) Kharashka ay dawladdu gasho ee ka dhasha dammaanaddaas
    j.) Faa'iido shareecada waafaqsan ama khidmadda la saaro rasamaalka daynta ee ay dawladdu bixisay.
3. Dhammaan lacagaha looga celiyo dawladda si'waafaqsan qodobkan, waxa lagu shubi doonaa keydka dakhliga guud.

## Qodobka 58aad
## Maareynta Daymaha Dawladda

1. Wasiirka ayaa masuulka ah maaraynta amaahda/daynta iyo dammaanadaha dawladda iyo dayn maaliyadeedyada kale ee dawladda; si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka, iyada oo la curin doono Xeerka Maamulka Daymaha iyo Amaahaha Qaranka (Public Debt Management Act).
2. Wasiirku waxa uu 15ka bisha July ee sannad kasta warbixin faahfaahsan ka diyaarin doonaa una gudbin doonaa guddida dhaqaalaha, iyada oo guddiduna warbixin ka siin doonta Golaha maareynta amaahaha, dammaanadaha iyo dayn maaliyadeedyada dawladda ee sannad maaliyadeedkii kal hore.

## Qodobka 59aad
## Kaydka Dakhliga Guud Ayaa Laga Bixinayaa Lacagaha Bixinta Deynta Ama Kharashaadka Dammaanadda

Iyadoon loo baahanaynin in wax qoondayn ah loo sameeyo, waxa si toos ah kaydka dakhliga guud looga bixinayaa lacag kasta oo ay tahay in ay dawladdu bixiso ee ka mid ah:

1. Dib u bixinta raasamaalka amaahda ama bixinta faa'iidada shareecada waafaqsan ee ka dhalata amaahda.
2. Faa'iido shareecada waafaqsan ah ama khidmadaha kale ee la saaro sendooyinka khasnadda dawladda, dammaanad lacageedyada (bonds) ama saamiyada loo bixiyo si'waafaqsan qodobka 54aad iyo shuruudaha uu wasiirku soo saaro si'waafaqsan xeerkan.
3. Bixinta dammaanadaha ku xusan qodobka 57aad ee xeerkan.

## Qodobka 60aad
## Maaraynta Deeqaha Dawladda

1) Deeqaha ay dawladdu ka hesho dawladaha shisheeye ama qof kasta oo kale waxa guddoomi doona wasiirka isaga oo dawladda ka wakiil ah.
2) Dhammaan deeqaha ay helaan hay'adaha dawladda waa in lagu daraa miisaaniyadda, iyada oo Wasaaradda Qorshayntu ay kala shaqayn doonto Wasaaradda Maaliyadda sidii farsamo ahaan loogu soo dari lahaa miisaaniyadda deeqahaas, waxa reebban in la isticmaalo deeq kasta oo aanu ansixin Golaha Wakiilladu.
3) Looma oggola dhamaan hay'adaha/wasaaradaha iyo shirkadaha ama wakaaladaha dawladdu leedahay in ay galaan heshiisyo ay ku helayaan deeq, taasoo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah iyada oo aanu wasiirku la saxeexin, Golaha Wakiilladdana aan laga ansixin.

## Qodobka 61aad
## Warbixinta Amaahaha, Deeqaha iyo Dammaanadaha

1. Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo Golaha Wakiillada (Mashruuca sharci) ee maaliyadda (miisaaniyadda), wuxuu ka horaysiinayaa in loo jeediyo macluumaadka la xidhiidha isku gaynta daynta dawladda Somaliland ee sannad maaliyadeedkaas, taas oo muujinaysa waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin:
   b. Isu gaynta raasamaalka iyo ilaha amaahaha iyo daynta.
   t. Xaddiga ku ururay oo ah qaab faa'iido oo waafaqsan shareecada ee amaah kasta iyo dayn kasta.
   j. Waxa loogu talaggalay bixinta ama dib u bixinta dayn kasta iyo amaah kasta.
   x. Isticmaalka iyo waxqabadka amaah kasta iyo dayn kasta oo la soo qaatay iyo ilaa xadka la gaadhay hadafyadkii bartilmaameedka ahaa ee dayn kasta ama amaah.
2. Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo Golaha Wakiillada xeerka sharci ee maaliyadda wuxuu ka horraysiin doonaa macluumaad la xidhiidha qaddarka guud ee deeqaha la siiyay Somaliland iyo ilahooda, taas oo muujinaysa isticmaalkooda iyo waxqabadka deeq kasta oo ay ku jirto illaa iyo xadka la gaadhay hadafyadii bartilmaameedka ahaa ee deeq kasta;
3. Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo mashruuc sharci Golaha Wakiillada, wuxuu ku dari doonaa macluumaad la xidhiidha dhammaan dammaanadaha (Masuuliyad qaadista) amaahda, daynta iyo deeqaha wasaaradaha, waaxaha, wakaaladaha, dawladaha hoose iyo gobollada ama hay'adaha dawladda.

## Qodobka 62aad
## Awooda Amaah ama Dayn Qaadasho ee Golayaasha Dawladaha Hoose

1) Golayaasha dawladaha hoose wax awood ah u malaha qaadasho amaah ama dayn dibadeed. Hasayeeshee, waxay awood u leeyihiin in ay si'waafaqsan iyo ujeeddada uu oggolyahay qodobka 94aad ee wax kabeddelka Xeerka Ismaamulka Gobollada & Degmooyinka ay u dayn u qaataan gudaha kaddib marka uu Wasiirka Arrimaha Guduhu oggolaado ee uu wasiirkuna ansaxiyo oggolaanshaha Wasiirka Arrimaha Gudaha.
2) Lacagta daynta ee uu si'wafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan loo qaato, waxa lagu shubi doonaa kaydka dakhliga golaha deegaanka ay khuseyso, loona isticmaali doonaa ujeeddadii loogu talaggalay.

# QAYBTA SAGAALAAD
# DIYAARINTA, BAADHISTA IYO HUBINTA WARBIXINAHA XISAABAADKA

## Qodobka 63aad

## Xisaab Xidh Sannadeedka Hay'adaha Dawladda iyo Dawladaha Hoose

1) Markuu dhammaado sannad maaliyeedku:
   b) Sarkaakiisha fulinta hay'adaha dawladdu waxay laba bilood gudahood, iyagoo racaya qaabka uu dejiyo Xisaabiyaha Guud, ku diyaarin doonaan uguna gudbin doonaan Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawraha Guud ee Qaranka xisaab xidh sannadeed xambaarsan xisaabaadka iyo xogaha ku xusan Faqradda 2aad ee jadwalka 1aad ee xeerkan.
   t) Maamulaha shirkad dawladeed ama sanduuq gaar ah ama sarkaalka fulineed ee hay'ad aan ahayn kuwa ku xusan faqradda 1aad ee sare wuxuu laba bilood gudahood kaddib dhammaadka sannad maaliyadeedka, isagoo raacaya qaabka uu u dejiyo xisaabiyaha guud, ku diyaarin doonaa uguna gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud warbixinta xisaab xidhka shirkadda uu masuulka ka yahay, nuqulna siin doonaa wasiirka.
   j) Warbixin xisaabeedka loo gudbnayo si'waafqsan qodobkan:
      i. Waa in loo diyaariyo si'waafaqsan heerarka habsimo (standards)/halbeegyada xisaabaadka guud ahaan la aqoonsan yahay ee ay dawladuhu isticmaalaan iyo awaamiirta Xisaabiyaha Guud uu hadba soo saaro.
      ii. Haddii aan loo diyaarin si ka duwan heer xisaabaadka guud ahaan la'aqoonsan yahay, waa in la sheego sababaha looga leexday oo ay kala taliyeen xirfadlayaasha xisaabaadka ee Somaliland oo uu ansixiyo Xisaabiyaha Guud loona adeegsado in lagu maamulo xisaabaadka dawladda, waxana uu sheegi doonaa sababaha isbeddelkaas loo sameeyay.
      iii. Waa in lagu sheego hab xisaabeedka la isticmaalay ee lagu saleeyay diyaarinta warbixin xisaabaadka iyo haddii laga leexdey qaybo muhiim ah oo hab xisaabeedka lagu saleeyey diyaarinta warbixn xisaabeedkana, waa in la tilmaamo qaybaha laga leexdey iyo sababaha looga leexdey.
      iv. Waa inay tibaaxdo tallaabooyinka ay qaadday iyo waxa ay ka fulisey tallabixintii uu Golaha wakiilladu ka bixiyay warbixintii Hantidhawraha Guud.
   x) Hantidhawraha Guud wuxuu si'waafaqsan Xeerka Hantidhawrka Qaranka baadhis iyo hanti dhawrid ugu samayn doonaa warbxin xisaabeedyada loogu soo gubiyo si'waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, isla markaana warbixin hantidhawr ugu gudbin doonaa Golaha Wakiillada si'waafqsan Dastuurka.

## Qodobka 64aad

## Xisaab Xidh Sannadeedka Guud ee Dawladda

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu muddo saddex bilood gudahooda kaddib dhammaadka sannad miisaaniyadeed kasta, isagoo raacaya qaabka uu dejiyo Golaha xeer-dejinta halbeegyada xisaabaadku, ku diyaarin doona uguna gudbin doona Hantidhawraha Guud iyo wasiirka:
   b) Xisaab xidhka guud ee qaranka oo ka kooban xisaab xidhka hay'adaha dawladda (dawladda dhexe) iyo xisaab xidhka dawaladaha hoose oo xambaarsan xisaabaha iyo xogaha xusan faqradda "1aad" ee jadwalka 1aad ee xeerkan.
   t) Warbixnta xisaab xidhka shirkadaha dawladda iyo sanduuqyada gaarka ah ee loo soo gudbiyay sida ku xusan Faqradda 2aad ee qodobka 63aad ee xeerkan.
   j) xisaab xidh sannadeedka kaydka dakhliga xaaladha degdegta.
   x) Xisaab xidhka kharash miisaaniyadeedka qarsoodiga ah.
2. Xisaabiyaha Guud wuxuu warbixin xisaabeedka uu soo gudbinayo ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobka ku muujin doonaa wax kasta oo nusqaan gaabis ah ama asbaab kale oo uu ku arko xisaab xidhkaasi ee ugu muuqda ama uu aamino in ay saameyn mugle ku leedahay gudashada masuuliyadda wasiirka ee xeerkani dhigayo.

3. Xisaabiyaha Guud wuxuu warbixinta uu gudbinayo ku tibaaxi doonaa wax kabeddalo uu usoo jeedinayo in lagu sameeyo nidaamyada iyo kala soocidda xisaabaadka, sumaddaha xisaabaadka isaga oo soo raacinaya sababaynta soo jeedintsaas iyo sida wax kabeddelka uu soo jeedinayaa wax tar ugu yeelan doono hagaajinta xisaabta iyo isla xisaabtanka.

## Qodobka 65aad

## Warbixin Xisaabeedka Saddex Biloodle Ah

1) Markuu dhammaado rubuc sannad maaliyadeedku:

b) Sarkaalka fulinta ee hay'ad dawladda dhexe iyo sarkaalka fulinta dawlada doose.

t. Maamulaha ama sarkaalka fulineed ee Shirkad dawladeed ama mashruuc gaar ahi, wuxuu si'waafaqsan qaabka uu u dejiyo Xisaabiyaha Guud u diyaarin doonaa muddo 15 cisho gudahood ahna ugu gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawraha Guud warbixinta rubuc sannad maaliyadeedka uu u xilsaaran yahay, nuqul warbixintan ahna wuxuu siin doonaa wasiirka wasaaradda ama masuulka madaxa ka ah ama uu hoostago.

x) Warbixinta rubuc sannad maaliyadeedka ee kor ku xusun waa inay si cad u muujinayso xogaha warbixin xisaabeed (financial) iyo xogaha aan maaliyadda ahayn (non-financial) ee uu sarkaalka fulineed ama maamuluhu maamulay rubuc sannadeedka laga warbxinayo.

Kh) Muddo 45 casho gudahood ah kaddib dhammaadka rubuc sannad maaliyadeedka, Xisaabiyaha Guud wuxuu isku dubaridi doonaa warbixnaha ay u soo gudbiyaan saraakiisha fulintu kana diyarin doonaa warbixinta guud ee rubuc sannad maaliyadeedka ee dawladda, isla markaana u gudbin doona Wasiirka iyo Hantidhawaha Guud.

# QAYBTA TOBNAAD

# ILAALINTA XISAABAADKA WAKAALADAHA DAWLADDA

## Qodobka 66aad

## Xisaabaadka Wakaaladaha Dawladda

1) Iyadoo aan loo eegayn wax kasta oo ku lid ah xeer dhaqangalay, wakaalad dawladeed waa inay muddo afar bilood, dhammaadka sannad maaliyeedkeedka, diyaarisaa una gudbisaa wasiirka xisaab hanti dhawrsan oo la xidhiidha hawlqabadkeeda sannad maaliyadeed.

2) Xisaabaad sannadeedka ku xusan faqradda (1aad), waa in loo diyaariyaa si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee uu oggol yahay xisaabaadka dawliga ah waa in la horgeeya Golaha Wakiillada, wasiirka muddo aan ka badnayn hal bil kaddib marka uu wasiirku helo, marka laga reebo, haddii Golaha Wakiilladu aanay lahayn kalfadhi, markaas oo warbixintaasi la horgaynayo Golaha wakiillada maalinta ugu horreysa ee kalfadhiga ku xiga.

## Qodobka 67aad

## Maamulka iyo Ilaalinta Xisaabaadka Wakaaladaha Dawladda

1) Iyada oo aan loo eegayn in ay lid ku tahay xeer kale oo dhaqangal ah, xisaabaadka wakaalad dawladeed kasta waa inuu baadhis ku sameeyaa Hantidhawraha Guud.

2) Isagoo gudanaya waajibaadkiisa qaybtan ku xusan, Hantidhawraha Guud:

b. Wuxuu yeelan doonaa go'aan ka gaadhis iyo awoodo la mid ah kuwa qodobka 31aad ee xaarkani siinayo Hantidhawraha Guud, marka loo eego lacagaha, shatiyada (stamps), dammaanadaha, kaydadka iyo hantida kale ee ay leedahay wakaalad dawladeed, haddii lacagaha, shatiyada, dammaanadaha, kaydka bakhaarka yaalla, ama hantida kale ee hay'ada dawladdu ay noqdaan lacago dawladeed iyo hanti dawladeed sida ay u kala horreeyaan, isla markaana saraakiisha wakaalada dawladdu ay noqdaan saraakiil dawladeed oo ka tirsan shaqaalaha dawlada.

t. Wuxuu awood u siin karaa qof kasta oo u qalma in loo magacaabo hantidhawre shirkadeed, ama sarkaal kasta oo dawladeed, isaga oo ka wakiil ah Hantidhawraha Guud inuu kormeero, baadho ama hubiyo diiwaannada iyo xisaabaadka cid kasta oo Hantidhawraha Guud looga baahan yahay inuu baadhis ku sameeyo sida ku cad qaybtan. Qofkaasi ama sarkaalkaasi wuxuu baadhitaanka hantidhawriseed ee uu samaynayo u fulin doonaa si'waafaqsan

mabaadii'da caalami ahaan la aqbali karo ee baadhitaanka hantiyeed, isla markaana wuxuu Hantidhawraha Guud ugu warbixinayaa habka uu u dejiyo Hantidhawraha Guud.

3) Hantidhawraha Guud waxa uu diyaarinayaa warbixin ku saabsan baadhista xisaabaadka ee lagu xusay qodobkan, waxaana uu u diri doonaa wasiirka iyo wakaalladda dawladda ee ay khusayso.

4) Wakaaladaha dawladdu, muddo dhan 21 maalimood gudohood ah waa inay:

   b) U gudbiyaan wasiirka u aragtidiisa warbixinta ee lagu soo gudbiyay faqradda (3aad) ee qodobkan; iyo nuqul la caddeeyay u diraa oo ku saabsan aragtidiisa Hantidhawraha Guud ahaan.

   t) Wasiirku waxa uu muddo dhan laba iyo afartan cisho (42 maalmood) kaddib marka uu helay warbixinta uu diyaariyay Hantidhawraha Guud sida ku cad faqrada (2aad) ee isla qodobkan, waxa uu gudbin doonaa warbixintaas iyo wixii kale ee aragtidiisaa ee ay samayso wakaalad dawladeed, sida ku cad faqradda (2aad) ee isla qodobkan ee xeerkan, ee la gaynaayo Golaha Wakiillada.

5) Qodobkani waxa kale oo uu khuseeya:

   b) Wakaalad dawladeed kasta.

   u) Maamul dawladeed kasta oo xeer lagu aasaasay oo ayanay ku jirin Golayaasha Deegaanku, taas oo hesha miisaaniyad ama lacag kab ah.

   j) Laga maalgaliyo in ka badan kala badh dakhligeeda lacagta dawlada.

   x) Hay'ad kasta oo aan ahayn golayaasha deegaanka, taas oo uu baadho Hantidhawraha Guud.

## QAYBTA KOW IYO TOBNAAD
## QODOBBO KALA DUWAN

### Qodobka 68aad

### Ka Tanaasulka Sheegashada Iwm Qiime Tirista Lacagta iyo Alaabta Bakhaarada Dawladda.

1. Wasiirku waxa uu haddii qaraar ka soo baxay Golaha Wakiiladda oo u ogolaado sidaas, isaga oo raacaya illaa iyo xadka lagu cayimay qaraar kaasi, ka tanaasuli karaa ama xawili karaa wax sheegasho ah isaga oo dawladda ka wakiil ah ama wax adeeg ah oo dawladda loo qabtay, waxaanu qiimatiris ku samayn karaa khasaaraha ama hoos u dhaca ku timid lacag dawladeed iyo khayraad dawladdu leedahay.
2. Qaraarka lagu xusay faqrada 1aad ee qodobkan, waxa lagu cayimi karaa qaddarka ugu badan ee loo oggolaaday qiimatiris kasta ama ka dayn kasta iyo isu gaynta guud ee loo oggolaaday in ay noqoto mid la tiray ama laga tanaasulay sanad maaliyadeed.
3. Wasiirku waxa uu qoraal uu isaga uu saxeexay, u igman karaa sarkaal kasta awood kasta haddii wasiirka loo oggolaaday in uu adeegsado qaraar ka soo baxay Golaha Wakiillada oo ku xusan qodobkan.
4. Dhammaan xisaabaadka uu ansixiyo wasiirku ee qodobkan hoos timaadaa waxa lagu dari doonaa xeerka qoondada ee kaabista ah oo la keeni doono Golaha Wakiillada, si Loo sharciyeeyo qaddarka qoondadaas.
5. Haddii mar u dhaco khasaare, tanaasul, cafis ama khasaare guud yimaaddo ama dib u celin, ama dheeraad laga tanaasulay ama dib loo celiyay qaddarkaasi uu oggolaaday qaraar kaas ee lagu xusay isla qodobkan faqraddiisa 1aad.

### Qodobka 69aad

### Denbiyada Iyo Ciqaabaha

1. Qof kasta oo aan keenin sababo macquula oo aan xafiiska Hantidhawraha Guud ee qaranka, wasiirka maaliyadda iyo agaasimaha guud u soo gudbin macluulmaadka maliyadeed ee looga baahday.

   b. Carqaldeeya ama ka hor istaaga hawlgallada xeerku u jideeyay Hantidhawraha Gudaha ama Xisaabiyaha Guud inuu guto waajibadyadiisa ku xusan xeerkan.

t. Furata ama sababta in la furo xisaab Bangi oo dawladdu leedahay oo si rasmi ah loo isticmaali doono iyadoo aan oggolaasnho laga helin Xisaabiyaha Guud ama ku xadgudba wajibaadyada khuseeya Xisaab bangiyeedka ee ku xusan qodobka 39aad (4) ee xeerkan.

j. Ah sarkaal fulineed aan haysan sababo la xaqiijiyay oo waajibaadyada iyo shuruudaha uu xeerkani dhigayo fulin waaya masuuliyadaha xeerkani saarayo; waxa uu galay denbi, waxaanu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo u dhexeysa 5 milyan ilaa 6 milyan oo shilinka Somaliland ah iyo/ama xadhig hal sanno ilaa laba sanadood ah.

2. Qof kasta oo magaca dawladda ku qaata amaah ama wax kebeddela ama amaah dawladeed oo hore loo siiyay

   b. Magaca dawladda ku bixiya dammaanad.

   t. Diida ama ka gaabiya fulinta waajibka saarnaa inuu lacag dawladdeed ku shubo ama dhiteeyo Bangi.

   j. Gala kharash dawladeed oo aanu u oggolaanshiyo u haysan ama gala waajibaad kharash aanu fasax u haysan (un authorized commitment).

   x. Ka gaabiya diyaarinta iyo haynta diiwaannada iyo buugta sharcigu waajibiyay inuu diyaariyo ama waxyeeleeya ama baabi'iya ama lumiya diiwaanno ama buugta khusaysa maaliyadda iyo hantida dawladda.

   Kh. Ka been abuura ama geliya xogo uu og yahay in ay been yihiin diiwaannada ama buugta xisaaabaadka dawladda.

   d. Ku bixiya kharaashaadka dawladda ujeeddo ama hawl ka duwan tii loo qoondeeyey

   r. Isagoon fasax haysan baahiya ama si sharci darro ah cid u siiya xogaha khuseeya maaliyadda iyo hantida, Waxa uu galay dambi, waxaanu mutaysan doonaa ganaax lacageed u dhaxeeya 15 ilaa 30 milyan oo Shiling ama xadhig ciqaabeed u dhaxeeya 3 ilaa 5 sannadood ama labadaba.

a. Dhammaan xogaha ku jira nidaamka maaraynta xogaha maaliyadda ha noqdaan sawir, muuqaal, qoraal ama qayb ka mid ah xogta oo muujinaysa awoodaha oggolaanshaha iyo sii daynta kharash, gelid balanqaad, wareejin lacageed ama ansixin IWM., waxa loo adeegsan karaa maxkamadda horteeda caddayn ahaan, waxaanay leedahay sugnaansho lid ku ah cidda awooda lahayd.

### Qodobka 70aad
### Ganaaxyada Iyo Dulsaarrada (Penalties and Surcharge)

1. Wasiirku wuxuu, isaga oo ku soo saaraya qaraar ama xeernidaamiye dhigi karaa ganaaxyada ka yaalla ciddii ku dhaqmi wayda xeerkan ama xeernidaamiyaha laga dheegtay xeerkan, ganaaxyadaasi oo aanu xeerkani jidayn isaga oo aan dhaafinayn ganaax lacageed oo aan ka badnayn SLSH 200,000,000 (laba boqol oo milyan).
2. Qodobkan waxa looga jeedaa sarkaal dawladeed waxa ku jira qofka ahaan jiray sarkaal dawladeed, ama lagu aaminay maal dawladeed yaanu ahaan ba shaqaale dawladeed'e

### Qodobka 71aad
### Wax Kabeddelka Jedwalka Koowaad

Wasiirku waxa uu wax ka beddeli karaa jedwallada xeerka ku lifaaqan wuxuuna wax ka bedelkaas u soo gudbinayaa Golaha Wakiillada.

### Qodobka 72aad
### XeerNidaamiyayaal

Wasiirku waxa uu ku soo saarayaa xeer wasiir xeernidaamiyayaal lagu dhaqangelinaayo xeerka, hagayaal ama habraacyo lagu dhaqangalinayo xeerka ama lagu faahfaahinayo oo aan xeerka ka hor imanayn.

## Qodobka 73aad

## Xeerkan iyo Raadaynta Xeerarka Kale

1. Mabda'a ahaan xeerkani waa xeerka u gaar ah habraacyada maamulka maaliyadda dawladda isaga ayaana mabd'a ahaan yeelanaya mudnaanta isla markaan gundhig u ah xeerarka kale ee maliyadda, mabaadii'da xeerkani jidaynayo laguma nasikhi karo xeer kale.
2. Haddii qodob ama qodobbadda xeerkan iyo qodobbada faahfaahinaya habraacyada maaliyadeed ee golayaasha deegaanka ee 89aad-94aad ee Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer.Lr.23/2019, iyo habraacyada kale ee maaliyadeed ee golayaasha deegaanka ay nuxur ahaan iska horyimaaddaan waxa la raacayaa oo mudnaanna yeelanaaya habraacyadda ay jidaynayaan qodobadda xeerkani.

## Qodobka 74aad

## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka Golaha Wakiilladu ansixio, Madaxweynuhu saxeexo si'waafaqsan habraacyada xeerdejinta ee ku tilmaaman Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

## JADWALKA KOOWAAD

### Qodobbo Khuseeya Warbixin Diiwaan Xisaabeedka

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu Hantidhawraha Guud iyo wasiirka u gudbin doonaa diiwaan xiisaabeedyadan (accounts) soo socda:-

b) Xaashida dheeligatiran (balance sheet) oo muujinaysa diiwaan xisaabeedka urursan ee hantida iyo daymaha ee dhammaan qasnadaha dawladda (public funds) iyo hay'adaha kale ee gebi ahaan laga maalgeliyo kayda dakhliga guud.

t) Diwaan xisaabeedka urursan ee fulinta miisaaniyadda (statement of income and expenditure) oo muujinaya xisaabta urursan ee dakhliga iyo kharashka dhammaan qasnadaha dawladda (Public Fund) iyo hay'adaha kale ee gebi ahaan laga maalgeliyo kayda dakhliga guud.

j) Diwaanada urursan ee dhaqdhaqaaqa lacagta naqadka (cash flow) ee dhammaan qasanadda dawladda (public Fund) iyo hay'adaha kale ee gebi ahaanba laga maalgeliyo Kayda dakhliga guud, kaas oo muujinaya dakhliga, kharashka iyo maalgalinta sannadka.

x) Xaashida dheelitiran (Balance sheet) oo muujinaysa hantida iyo daymaha kayda dakhliga guud oo kali ah.

kh) Xisaabta isticmaalka maaliyadeed (statement of financial performance) oo muujinaysa dakhliga iyo kharashka kayda dakhliga guud oo kali ah.

d) Xisaabta dhaqdhaqaaqa lacagta naqadka ee kayda dakhliga guud oo muujinaysa dakhliga, kharashka lagu hawlgalayo, lagu maalgelinayo laguna bixinayo lacagta iyo hawlqabadka lacag bixineed ee sannad maaliyadeedkaas.

r) Siyaasadda xisaabaadka iyo qoraallada loo addegsaday diyaarinta xogo maaliyadeedka.

s) Qaddarka lacagaha daynta lagu leeyahay dawladda sannad miisaaniyadeedka dhammaaday.

sh) Xisaabaha daymaha lagu qaato casaynta xisaabta Bangi (bank overdrafts) iyo amaah dawladeed ee ay dawladdu dammaanad qaadday dhammaadka sannad miisaaniyadeedka.

dh) Xisaabta dhammaan daymaha lafilayo (contingent liabilities) sheegaysa dhammaan qaamaha aan lagu talagalin.

c) Qaddarka xisaabta daymo qaadashada dawladda (loans raised by the Government) ee taagan dhammaadka sannadka.

g) Xisaabta maalgashiga dawladda oo muujinaya qiimihii asalka ahaa iyo kan maanta maalgashigaas.

f) Warbxin si kooban u tibaaxaysa xisaabta (summary statement) khasaaraha ee soo gaadhay lacagaha iyo bakhaarada dawladda ee la ogaaday, latirtiray ama cid laga saamaxay ama laga dhaafay sannad maaliyadeedka iyo awoodaha sharci ee loo cuskaday tirtirka ama saamixidda ama dhaafitaanka ee uu sarkaalka fulintu/idman u soo gudbiyo sida ku xusan faqradda 2aad(k) ee jadwalkan.

q) Warbixin si kooban u tibaaxaysa dakhli baaqday ee madax dakhliyeed kasta (arrears of revenue for each revenue head), taas oo ka turjumaysa dakhliga baaqday ee uu sarkaalka fulinta u soo gudbiyo sida ku xusan faqradda 2aad(i) ee jadwalkan.

k) Warbixin si kooban u tibaaxaysa balanqaadyda lagalay ee alaabooyinka iyo adeegyada ee ku taagan madax qoondeyn kharasheed kasta dhammadka sannad miisaaniyadeedka, kaas oo ka turjumaya soo ururinta bayaannada xisaabta ballanqaadyada ay soo gudbiyaan sarkaalka fulintu/Idman sida ku xusan faqradda 2(f) ee jadwalkan.

k) Warbixin si kooban oo tibaaxaysa bakhaarada iyo hantida madax qoondeyn kharasheed kasta oo ka turjumaya soo ururinta warbixinta hantida ee uu soo gudbiyo sarkaalka fulintu sida ku xusan xarafka (j) ee faqradda 2aad ee jadwalkan.

l) Warbixin kasta oo kale oo waafaqsan qaabka Golaha Wakiilladu uu hadba dalbado.

2. Sarkaalka fulintu wuxuu Xisaabyaha Guud u gudbin doonaa diiwaan xisaabeedyadan (accounts) soo socda oo uu saxeexay, una diyaariyay si'waafaqsan qaabka uu Xisaabiyaha Guud u dejiyo:

b) Warbixin fulin maaliyadeed (statement of receipt and Payments) ee sannad miisaniyadeed kaas.

t) Xaashida dheelitiran (balance sheet) oo muujinaysa xaaladda maaliyadeed ee sannad miisaniyadeed kaas.

j) Warbixinta xisaabta dhaqdhaqaaqa lacagta caddaanka ah (cash flow statement) taas oo muujinaysa dakhliga iyo kharashka iyadoo loo eegayo hawlgalka maalgelinta iyo deeqaha maaliyadeed (by operating, investing and financing) ee sannad miisaaniyadeedkaas.

x) Xisaabta qoondaymaha miisaaniyadda oo muujinaysa waxa lagu isticmaalay lacagta madax qooneyn miisaaniyadeed kasta, qaddarka kharashka laga galay madax qoondeyn miisaaniyadeed kasta iyo xaaladda madax qoondeyn miisaaniyadeed, kasta marka loo eego caddadka lacagata uu Golaha Wakiiladu u qoondeeyey madax qoondeyn miisaaniyadeedkaas.

kh) Warbixin xambaarsan caddadka lacagta ballanqaad la galay ee iibka alaabooyinka iyo adeegyada ee taagan dhammaadka sannad miisaaniyadeedka iyo xog kasta oo kale oo uu Xisaabiyaha Guud uga baahdo.

d) Warbixinta caddadka qaamaha lama filaanka ah ee dhammaadka sannad miisaaniyadeedka iyo warbixin kasta oo kale oo Xisaabiyaha Guud uga baahdo.

r. Warbixinta xisaabta dakhliga soo xarooday oo muujinaya caddadka dakhliga il kasta oo dakhli ee ku jirtay odoroska miisaaniyadda, caddadka si rasmi ah loo ururiyay ee soo xarooday iyo sharraxaadda wixii farqi ah ee u dhexeeya dakhliga soo xarooday iyo dakhliga la odorosay iyo xog kasta oo kale oo Xisaabiyaha Guud u baahdo.

s. Warbixinta xisaabta dakhliga baaqday oo muujinaya caddadka dakhliga baaqday ee il kasta oo dakhli sannad miisaaniyadeedkaas, haddii aanay jirin dakhli baaqday waa in la xuso.

sh. Warbixinta xisaabta hantida oo xambaarsan faahfaahinta iyo qiimayaasha dhammaan bakhaarada aan la qoondayn (unallocated stores) ee hoos yimaadda maamulkiisa dhammaadka sannad miisaaniyadeedkaas iyo waliba faahfaahinta iyo qiimayaasha hantida noocyo kale ah ee hoos timaadda maamulka sarkaalka fulinta hadba sida Xisaabiyaha Guud uu amro ama u baahdo.

dh. Warbixinta koobidda xisaabta (summary statement) khasaaraha ee soo gaadhay lacagaha iyo bakhaarrada dawladda ee la ogaadey, la tirtiray ama cid laga saamaxay ama laga dhaafay sannad miisaaniyadeedka gudihiisa iyo awoodaha sharci ee loo cuskaday tirtirka ama saamixidda ama dhaafitaanka; hadba sida uu xisaabiyaha guud ku amro ama u baahdo.

c. Warbixinta hawlqabad iyo guulaha laga gaadhay hawlaha qorshahawleedka fulinta sannad miisaaniyadeedka uu Golaha Wakiilladu ansaxiyay.

g. Warbixin kasta oo kale oo uu hadba u baahdo Xisaabiyaha Guud oo waafaaqsan qaabka uu amrro ama u dejiyo Xisaabiyaha Guud.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**